*Wargeyska*

# DALKA

Wargeyska Dalka, Waa wargeys Toddobaadle ah oo ay soo saarto Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska

TODDOBAADLE | ISNIIN | EMAIL: INFO@DALKA.SO

## MADAXWEYNAHA DALKA OO WARQADAHA AQOONSIGA KA GUDDOOMAY DANJIREYAASHA DALALKA SWEDEN IYO TALYAANIGA



Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Maxamed Cabdullaahi Farmaajo, ayaa warqadaha aqoonsiga ka guddoomay Danjireyaasha cusub ee Dalalka Talyaaniga iyo Sweden ee Soomaaliya.

Danjiraha Boqortooyada Sweden Mudane Staffan Tillander oo Madaxweynaha la wadaagay farriin iyo salaan uu uga siday Boqorka Sweden Mudane Carl XVI Gustaf, ayaa tilmaamay in dadaal uu ku bixin doono sare u qaadidda xiriirka Labada Dal, isaga oo Dowladda iyo shacabka Soomaaliyeed uga mahadceliyey soo dhaweynta diiran ee loo sameeyay.

Sidoo kale, Danjiraha cusub ee Dalka Talyaaniga Mudane Alberto Vecchi oo warqadahiisa aqoonsi u gudbiyey Madaxweynaha ayaa muujiyey sida uu ugu hanweyn yahay in uu ka mid noqdo bahda diblumaasiyiinta ka hawlgala Dalka Soomaaliya.

Vecchi, ayaa Madaxweynaha u gudbiyey dhambaal iyo salaan uu uga siday dhiggiisa Dalka Talyaaniga Mudane Sergio Mattarella, waxa uuna tilmaamay in Dalkiisu ay saaxiib dhow la yihiin shacabka Soomaaliyeed, xiriir soo jireen ahna uu ka dhexeeye Labada Dal.

Dhankiisa, Madaxweyne Maxamed Cabdullaahi Farmaajo ayaa Danjireyaasha uu warqadaha aqoonsiga ka guddoomay uga warbixiyey sida Dowladda Federaalka Soomaaliya ay uga go'an tahay xoojinta xiriirka ku dhisan iskaashiga iyo wax-wada-qabsiga ee kala dhexeeya Dalalka Caalamka.

Madaxweyne Farmaajo, ayaa Danjireyaasha cusub ugu hambalyeeyay xilalka loo Magacaabay, wuxuuna u sheegay in ay soo dhaweyn wanaagsan kala kulmayaan Shacabka Soomaaliyeed, Dowladda Federaalkuna ay ku Garab istaagayso gudashada waajibaadka diblumaasiyadeed ee loo soo igmaday.

Dhanka kale isla toddobaadkan, Madaxweynaha JFS Mudane Maxamed Cabdullaahi Farmaajo ayaa diray fariin ku aadan Xuska 14-ka Oktoobar, 14-ka Oktoobar waa maalin xasuus murugo u leh dadkeenna Soomaaliyeed. Waa maalin aan waynay boqollaal muwaadiniin ah oo uu taagnaa dib u dhiska iyo horumarka dalkeenna.

Waa maalin ay argagixisadu si arxan darro ah u xasuuqeen boqolaal muwaadiniin ah oo ku hawlanaa nolol maalmoodkooda, ayna agoomeeyeen kumannaan carruur ah.

Qofkasta oo Soomaaliyeed waa uu xasuusan yahay dareenkii muragada lahaa ee ka dhashay weerarkan bahalnimada ah ee argagixisadu ay ku bartilmaameedsadeen shacabkeenna. Si la mid ah taas waxaa muhiim ah in aan xasuusanno midnimadii, gurmadkii iyo sida dhammaan dadkeenna Soomaaliyeed ay ugu wada istaageen wax u qabashada shacabkeennii ay dhibaateeyeen cadawgu.

Tan iyo wakhtigaas Dowladdu waxa ay xoojisay hawlgallada qorsheysan ee lagaga hortegayo falalka waxashnimada ah ee ay soo qorsheeyaan argagixisada Alshabaab, waxa ayna geesiyaasheenna Ciidamada Qalabka sida burburiyeen saldhigyo cadawgu ay ka soo maleegi jireen weerarrada arxan darrada ah, sidoo kalena waxay ciidanku ka xoreeyeen deegganno ay cadawgu ku dhibaateeynayeen muwaadiniinteenna ku nool.

Ugu dambeyntii, waxaan Alle u weydiinaynaa naxariistiisa shuhaddadii innooga geeriyootay weerarkan, anigoo faraya Xukuumadda in laga warqabo dhammaan muwaadiniintii lixaadkooda ku waayey falkan banii'aadamnimada ka baxsan.

### TUSMADA

WARARKA WARGEYSKA Bogga 2-3-aad
ISLAAMKA IYO NOLOSHA Bogga 6-aad
ARRIMAHA DHALINYARADA Bogga 7-aad
FAALLO & FALANQEYN Bogga 5-aad
DHAQANKA IYO SUUGAANTA Bogga 8-aad
ARRIMAHA BULSHADA Bogga 7-aad
DHAQAALAHA & GANACSIGA
MURTI & MAAWEELO Bogga 9-aad

**Hay'Adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed**

Bogga 12-aad

Eeg Bogga 12-aad

## GUDDOOMIYAHA AQALKA SARE EE BJFS OO SHACABKA SOOMAALIYEED LA WADAAGAYXUSUUSTA DHACDADII 14-KII OKTOOBAR

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa shacabka Soomaaliyeed la Wadaagay Xusuusta Dhibaatadii ka dhacday isgoyska soobe ee magaalada muqdisho,

Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi Guddoomiyaha golaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa sheegay isagoo ku hadlaya Magaca Guddoonka iyo guud ahaan Golaha Aqalka Sare in uu Tacsi u Dirayo dadkii Soomaaliyeed ee ehelkood ku dhinteen iyo kuwii hantidooda uga baaba'aday Qaraxaasi, wuxuuna Eebe uga baryay dadkii ku dhintay in uu naxariistii janno ka waraabiyo ,

Gudoomiyaha golaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Mudane Cabdi Xaashi Cabdulaahi ayaa kuwii ka



danbeeyay qaraxii Soobe ee waxyeelada loogu geystay shacabkii soomaaliyeed in uu rabi ka jaasiyo.

2-sano ayaa laga joogaa markii Kooxda arxan laawayaasha ee u soo dhigtay gumaadka ummadda Soomaaliyeed ay dad badan ku xasuuqeen Isgoyska Soobe ee magaalada Muqdisho.

Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa dadaal badan ku bixisay sidii dadka dhibanayaasha u ah Qaraxaasi ula qeybsan lahayd waxyeelada soo gaartay.

## RA'IISUL WASAARE KHAYRE OO WASHINGTON UGA QEYB GALAY SHIRKA IMF IYO BANGIGA ADDUUNKA




Washington DC- Ra'iisul Wasaaraha xukuumadda federaalka Soomaaliya mudane; Xasan Cali Kheyre, ayaa Magaalada Washington DC ee Caasimadda Dalka Mareykanka uga qeyb galay shirka miiska wareegsan ee Bangiga iyo hey'adda Lacagta Adduunka.

Ra'iisul Wasaaraha ayaa khudbad uu shirka ka jeediyay waxa uu uga hadlay guulaha laga gaaray qorshaha deyn cafinta Dalka iyo sida ay Dowladda Soomaaliya uga go'antahay buuxinta shruudaha ku xiran in Dalka deynta laga cafiyo.

Shirkan oo ay soo qabanqaabisay Dowladda Ingiriiska ayaa xubnihii ka qeyb galay waxay isla qireen in Soomaaliya ay gaartay guula muhiim u ah mustaqbalka Dalka iyo gaaridda barta go'aanka ee deyn cafinta Dalka, waxa ayna ballan qaadeen in ay sii wadayaan taageerada iyo Garab istaagga Shacabka iyo Dowladda Soomaaliyeed.


Sidoo kale, isla toddobaadkaan ayaa Ra'iisul Wasaaraha xukuumadda federaalka Soomaaliya, mudane Xasan Cali Khayre, ayaa kormeeray Isbitaalka hooyada iyo dhallaanka Banaadir oo dowladdu ay dib ula wareegtay horraantii sannadkaan si uu qayb uga noqdo qorshaha horumarinta adeegyada caafimaad ee dalka.

Maamulka Istibaalka Banaadir oo Ra'iisul Wasaaraha uga war bixiyay xaaladda isbitaalka ayaa sheegay in isbitaalka adeeg caafimaad oo tayo leh lacag la'aanta ah loogu sameeyay 37,000 oo hooyooyin iyo carruur Soomaaliyeed ah oo 24,000 kamid ah ay yihiin carruur, intii u dhexeysay bilihii Feberaayo iyo September ee sannadkaan.

Ra'iisul Wasaare Xasan Cali Khayre oo bogaadiyay sida hufan ee maamulka isbitaalka iyo wasaaradda caafimaadku ay isaga xil saareen howl gelinta iyo horumarinta Isbitaalka, ayaa sheegay in loo baahanyahay in howsha la ballaariyo si dhammaan bulshada Soomaaliyeed ay u helaan adeegga caafimaad ee ay u baahanyihiin.

Dowladda oo dadaal xooggan ugu jirta horumarinta caafimaadka bulshada, ayaa bishii labaad ee sannadkaan dib ula wareegtay Isbitaallada Banaadir iyo Martiini, waxaana dhawaan Ra'iisul Wasaare Xasan Cali Khayre uu dhagax dhigay Xarunta Bangiga dhiigga oo qayb ka ah qorshaha horumarinta adeegyada caafimaad ee dalka.

## WASIIRKA WARFAAFINTA SOOMAALIYA OO DHIGGIISA JABUUTI KUSOO DHOWEEYAY XARUNTA WASAARADDA



Wasiirka Warfaafinta Soomaaliya, Maxamed Cabdi Xayir {Maareeye } ayaa xarunta Wasaaradda ku soo dhaweeyay Wasiirka Warfaafinta iyo isgaarsiinta Jamhuuriyadda Jabuuti mudane; Ridwaan Cabdillaahi Bahdoon oo soo gaaray Caasimadda Soomaaliya.

Wafdiga Wasiirka Warfaafinta Jabuuti oo uu wehliyay Safiirka Jabuuti u fadhiya Soomaaliya iyo mas'uuliyiin kale ayaa booqday waaxyaha kala duwan ee Warbaahinta Qaranka oo ay ka mid yihiin TV ga, Radio Muqdisho iyo Keydka baaxadda weyn ee Radiyaha oo xasuus gaar ah u leh Dalka aan Walaalaha nahay ee Jabuuti.

Mas'uuliyiintan ayaa intii ku sugnaayeen Keydka Radio Muqdisho waxa ay dhagaysteen Suugaan ka tarjumaysa halgenkii loo soo maray gobannimada Jabuuti oo ay Soomaaliya door weyn ku lahayd.

Mas'uuliyiinta Wasaaradda oo uu hormuud u yahay Wasiir Maareeye ayaa wafdiga Jabuuti warbixin ka siiyay shaqooyinka Qaranka ay Wasaaradu u hayso iyo qaabka ay u shaqeyso.

Wasiirka Warfaafinta iyo Isgaarsiinta Jamhuuriyadda Jabuuti mudane; Ridwaan Cabdillaahi Bahdoon iyo wafdigiisa ayaa uga mahad celiyay madaxda Wasaaradda soo dhaweyntii loo sameeyay.

Wasiirka Warfaafinta Soomaaliya Maxamed Cabdi Xayir, ayaa ugu dambayn Xafiiskiisa kulan kula qaatay wafdiga Walaalaha Jabuuti,waxanay ka wada hadleen sidii Dowladda Jabuuti ay Gacan uga geysan lahayd tayeynta iyo xoojinta Warbaahinta Qaranka.

## WASIIR BEYLE OO WASHINGTON DC KULA KULMAY MADAX KA TIRSAN BANGIGA ADDUUNKA

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda ee xukuumadda Soomaaliya Cabdiraxmaan Ducaale Beyle oo ku sugan Magaalada Washington ee Dalka Mareykanka ayaa kulan la qaatay koox ka socota Bangiga Adduunka.

Madaxda uu la kulmay Wasiir Beyle ayaa waxaa hoggaaminayay Madaxweyne ku xigeenka Bangiga Adduunkaee Qaarada Afrika, Hafze Ghanem, waxana ay ka wada hadleen arrimo badan oo ku saabsan horumarinta Maaliyadda dalka Soomaaliya.

"Waxaan la kulannay koox ka socotay Bangiga Adduunka oo uu hogaaminayay Hafze Ghanem, oo ah Madaxweyne ku xigeenka Bankiga Adduunka ee Qaarada Afrika" ayuu yiri Wasiirku.

Wasiirka ayaa sheegay inay madaxda Bagiga Adduunka ugu warbixiyeen horumarka ballaaran ee ay Dowladda Soomaaliya ka samaysay hagaajinta nidaamka maaliyadda Dalka.

Wuxuuna intaa raaciyay Wasiirku in ay ka go'an tahay Bangiga Adduunka in ay la shaqeeyaan Dowladda Soomaaliya sidii horumar looga gaari lahaa dhinaca maaliyadda iyo kobaca dhaqaalaha oo hadda meel fiican maraya.



## SARAAKIIL KA SOCOTAY MADAXTOOYADA OO SHIR WADA TASHI LA QAATAY MADAXDA WASAARADDA ARRIMAHA DIBADDA

Saraakiil ka tirsan Madaxtooyada oo uu hoggaaminayo Kusimaha Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada Ahna Agaasime Kuxigeenka Mudane Cabdullaahi Sheekh Cabdikariim ayaa Xarunta Wasaaradda Arrimaha Dibadda kulan kula qaatay Wasiirka Arrimaha Dibadda Danjire Axmed Ciise Cawad, Wasiiru Dowlaha Arrimaha Dibadda Mudane Cabdulqaadir Axmedkheyr Cali iyo dhammaan Agaasimeyaasha Wasaaradda.

Kulanku inta uu socday waxaa laga wada hadlay qorsheyaasha booqasho ee Madaxda dalka iyo marti qaadyada caalamiga, dadaallada martigelinta shirarka caalamiga ah iyo sidii dib u habeyn loogu sameyn lahaa hannaanka hab-maamuska ee dowladda.

Wasiirka Arrimaha Dibadda Danjire



Axmed Ciise Cawad ayaa la wadaagay mas'uuliyiinta ka socotay Madaxtooyada ballamaha iyo booqashooyinka Madaxweynaha ee muddada soo socota, qorsheyaasha xoojinta xiriirka caalamiga ah iyo sidii kor loogu qaadi lahaa wadashaqeynta shaqaalaha Madaxtooyada iyo kuwa Wasaaradda ee ay shaqo wadaagga yihiin.

Kulankan dhinaca Madaxtooyada waxaa ka socday Agaasime Kuxigeenka Madaxtooyada Mudane Cabdullaahi Sheekh Cabdikariim, Agaasimaha Hab-maamuuska Madaxtooyada Mudane Cabdi Cumar Cali, Agaasime Kuxigeenka Warfaafinta iyo Xiriirka Warbaahinta Madaxtooyada Mudane Cabdirishiid Maxamed Xaashi.

## SHIR LOOGA HADLAYEY WAXQABADKA WASAARADDA QORSHEYNTA XFS OO MUQDISHO KA DHACAY



Shirkaan ayaa looga hadlay Waxyaabaha u qabsoomay Wasaaradda Qorsheynta oo ay ka mid yihiin Diyaarinta Qorshaha Sagaalaad ee Horumarinta Qaranka oo 26 September ay ansixiyeen Golaha Wasiiradda, Diyaarinta Istaraatijiyadda Maal-gashiga oo dhawaan la horgayn doona Golaha Wasiiradda iyo Diyaarinta Istaraatijiyadda Dowladd goballeedyada oo bilaaban doonto dhawaan, waxaana shirkaan guddoomiyeye Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Qorsheynta Marwo Fahma Axmed Nuur.

Shirka ayaa sidoo kale waxaa diiradda lagu saaray heerka uu marayo Shirka Istiraatiijiyadda oo horyaalo Golaha Shacabka Ee Baarlamaanka FS, Sahannada kala duwan ee Sameeysay Agaasinka Istaatistics iyo Warbxininta Isbadallada Suuqyada iyo badeecadaha Suuqyada (CPI)

Ugu dambeyntii Shirka waxaa lagu Boggaadiyey Shirka Golaha Horumarinta Qaranka (NDC) ee 24 September Ka qabsoomay Magaalada Muqdisho oo Ay Wasiiradda Qorsheynta Dowladda goballeedyada iyo Wasiirka Qorsheynta ay ku meel Mariyeen mashaariic muhiim u ah dalkeena.

## WARFAAFINTA MADAXTOOYADA IYO MADAXDA SONNA OO KA WADA HADLAY QORSHAHA BAAHINEED EE WAKAALADDA WARARKA QARANKA SOOMAALIYEED



Agaasimaha Wakaaladda Wararka Soomaaliyeed ee (SONNA) Mudane; C/llaahi Sheekh C/raxmaan (Heybe) ayaa Xarunta Madaxtooyada kula kulmay Agaasime ku-xigeenka Warbaahinta Madaxtooyada Mudane; Cabdirishiid Maxamed Xaashi iyo Saraakiil ka tirsan Xafiiska Warfaafinta ee Madaxtooyada Qaranka.

Mas'uuliyiinta ayaa ka wada hadlay sidii loo dardar gelin lahaa baahinta xogta ku saabsan dib u dhiska iyo horumarinta Dalka.

Sidoo kale, kulanka waxaa lagu muujiyey muhiimadda ay leedahay in Shacabku ay si dhaw ula socdaan xogta ku saabsan dalka, duruufaha ku xeeran Dowladnimadeenna iyo tallaabooyinka horumarineed ee ay wadajirka uqaadayaan Shacabka iyo Dowladdooda.

Agaasimaha Wakaaladda Wararka Qaranka Soomaaliyeed ayaa tilmaamay muhiimadda ay leedahay wada shaqaynta Wakaaladda iyo hey'adaha Dowladda, maadaama ay aas-aas u tahay haqab tirka baahida shacabku ay u qabaan ogaanshaha wararka iyo qorsheyaasha Dowladda.

Dhankiisa, Agaasime Kuxigeenka Warbaahinta Madaxtooyada Mudane; Cabdirishiid Maxamed Xaashi ayaa adkeeyey sida ay uga go'an tahay Madaxtooyada sara u qaadidda tayada Warbaahinta Dowladda iyo midda gaarka loo leeyahay, si kor loogu qaado wacyiga shacabkeenna ee dowladnimada, dimuqraadiyadda iyo horumarka.

## WASIIRU DOWLAHA IYO KU-SIMAHA AGAASIMAHA GUUD EE MADAXTOOYADA JFS OO LA KULMAY SAFIIRKA SHIINAHA



Wasiiru Dowlaha Madaxtooyada Qaranka Mudane Cabdulqaadir Sheekh Cali (Baqdaadi) iyo Kusimaha Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada Ahna Kuxigeenka Agaasimaha Guud Mudane Cabdullaahi Sheekh Cabdikariin ayaa Xarunta Madaxtooyada ku qaabilay Danjiraha Shiinaha u fadhiya Soomaaliya Mudane Qin Jian.

Madaxda ayaa isla qaabeeyey hannaanka xoojinta xiriirka wada shaqeyneed ee labada dal iyo sidii loo dardargalin lahaa qorsheyaasha iskaashi ee ay horay isula garteen labada dowladood.

Sidoo kale, Wasiiru Dowlalaha iyo Kusimaha Agaasimaha Madaxtooyada ayaa uga warbixiyay Danjiraha fursadaha maalgashi ee ka jira dalka iyo isdhaafsiga ganacsiga ee ka dhaxeeya ganacsatada Soomaaliyeed iyo Shiinaha.

Danjiraha Shiinaha u fadhiya Soomaaliya ayaa tilmaamay muhiimadda uu leeyahay kobaca muuqda ee dhanka ganacsiga ee u dhexeeya labada dal, isaga oo muujiyay in ay ka go'an tahay dalkiisa sare u qaadidda iskaashiga maalgashi iyo ganacsi.

# DACWADDII BADDA EE SOOMAALIYA IYO KENYA OO MAR KALE DIB LOO DHIGAY

Maxkamadda Caddaaladda Adduunka ee ICJ ayaa go'aamisey in dhageysiga dacwadda Badda ee u dhaxeysa Soomaaliya iyo Kenya dib loo dhigay, markii ay xukuumadda Nairobi sidaasi codsatay.

Dhagaysiga dacwadda ayaa lagu wadaa in uu furmo June 8- 12, 2020, iyadoo Maxkamaddu ay sheegtay inaan mar kale dib loo dhigi doonin dhagaysiga dacwadda Badda.

Ra'iisulwasaare ku xigeenka Soomaaliya, Mahdi Maxamed Guuleed Khadar oo la hadlay warbaahinta Qaranka ayaa sheegay in Dowladdu ay soo dhaweyneyso go'aanka kama dambeystа ah ee ay Maxkamaddu qaadatay

Kenya ayaa marar badan sameysay isku dayo ay ku dooneyso in ay ku baajiso dhagaysiga dacwadda oo ay Soomaaliya kol hore u gudbisay Maxkamadda caddaaladda Adduunka, iyadoo dooneysa in si hoose ay Labada Dowladood u xalliyaan kiiska.

## GUDDOOMIYAHA GOBOLKA BANAADIR OO LA KULMAY DANJIRAHA MIDOWGA YURUB EE SOOMAALIYA



Guddoomiyaha Gobolka Banaadir, ahna duqa Muqdisho Mudane Cumar Maxamuud Maxamed (Filish) ayaa Xarunta Aqalka Dowladda Hoose ee Xamar kulan kula qaatay Safiirka Midgowga Yurub u fadhiya Soomaaliya Danjire Nicolas Berlanga.

Guddoomiyaha ayaa la wadaagay Danjiraha Midowga Yurub ee Soomaaliya horumarka uu ku tallaabsanayo Gobolka, Arrimaha Barakacayaasha, dadaallada dib u dhiska iyo qorsheyaasha hortabinta u leh Maamulka Gobolka Banaadir.

Guddoomiye Cumar Filish oo uga mahad-celiyey Ururka Midowga Yurub taageerada ay siiyaan shacabka Soomaaliyeed ayaa kala hadlay sidii loo dardar gelin lahaa barnaamijyada horumarineed ee Ururka Midowga Yurub uu ka fuliyo Gobolka Banaadir.

Dhankiisa, Nicolas Berlanga ayaa ku ammaanay bulshada iyo maamulka Caasimadda sida ay ugu taagan yihiin horumarka iyo xaqiijinta dib u kabashada Gobolka, waxa uuna ballan qaaday in ay sii wadi doonaan taageerada iyo mashaariicda horumarineed ee ay ka fuliyaan Gobolka.

Sidoo kale, Danjire Nicolas waxa uu uga mahad-celiyey Maamulka iyo Bulshada Caasimadda soo dhaweynta diirran iyo fududeynta shaqada tan iyo markii uu soo gaaray dalka.

## MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE SUDAN OO WARAAQAHA AQOONSIGA SAFIIRNIMO KA GUDDOOMAY SAFIIRKA CUSUB EE SOOMAALIYA U FADHIN DOONA SUDAN



Madaxweynaha Golaha Sare ee Dawladda Sudan Mudane Cabdi-fitaax Al-burhaan ayaa Waraaqadaha Aqoonsiga Safiirnimmo ka guddoomay Danjire Maxamed Isxaaq ibraahim, Safiirka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee dalka Suudaan.

Safiirka ayaa markii laga guddoomay warqadihiisa Aqoonsiga waxa uu u mahad-celiyay Madaxweynaha Golaha Sare ee Dawladda Sudan Mudane Cabdi-fitaax Al-burhaan , waxaana uu gaarsiiyey Salaan uu kaga siday Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Maxamed Cabdullaahi Farmaajo.

Danjire Maxamed Isxaaq Ibraahim ayaa ka codsaday Jaaliyadda Soomaaliyeed ee Dalka Suudaan in si hagar la'aan ah ay ula shaqeeyaan, si ay isaga kaashadaan kor u qaadista Sharafta qeybaha kala duwan Soomaalida ku dhaqacan Dalkaasi .

## MADAXWEYNAHA D/GOBOLLEEDKA KOOFUR GALBEED OO QAABILAY MADAXDA URURKA CAALAMIGA AH EE SOCDAALKA



Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Mudane Cabdicasiis Xasan Maxamed (Lafta gareen)ayaa Xarunta Aqalka Madaxtooyada ee Baydhabo ku qaabilay Wafdi uu Hoggaaminayey Madaxa Ururka Caalamiga ee Socdaalka. IOM.

Kulankaasi oo ay goobjoogayaal ka ahaayeen Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta Maalgashiga Hormarinta Dhaqaalaha Dowlad Gobolleedka koonfur Galbeed Axmed Madoowe Nuunow Maxamed iyo Agaasimaha Guud Madaxtooyada Cabdulqaadir Maxamed Baafo

waxa diirada Lagu Sarayey Sidi IOM u kordhin lahayd Shaqada ay ka wado Gobolada Koonfur Galbeed, Waxaana aad loo falan qeeyey Sida ugu Haboon ee Wax loogu qaban Lahaa Arimaha Barakacayaasha Cafimaadka iyo Dardar Gelinta Mashariicda Dib u dhiska Magaaloyinka .

Madaxda kasocotay Hay.adda IOM ayaa Balan qaaday inay Sii Kordhin Doonan Adeegyada Shaqo ee ay ka wadaan Koonfur Galbeed Waxayna Sheegen in Dadka Barakacayaasha ah ee Soo Wajahay Dhaxanta iyo Roobabka Deerta ah ee Ka unkaday Guud ahaan Dalka ay Kaalmo Deg deg ah ay lasoo Gaari Doonan

Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Mudane Cabdicasiis Lafta gareen ayaa u mahadceliyey Madaxda Hay.adda IOM Waxana uu bogaadiyey Shaqada baaxada leh ee ay kawadan Gobolada Koonfur Galbeed WaMadaxweynuhu waxa uu soo jeediyay in ururka uu istaago sidii ay Wax uga qaban lahayeen Arimaha Bini adanimada gaar ahaan tayenta Xarumaha Cafimadka Barakacayasha iyo Kordhinta Mashariicda Dib u dhiska

# GUUXA SHACABKA



# GARDARROOY GURIGAA BA'A.

Markay Dowladnimo macaatay oo Maqaam sare gaartay, Maxaa laysku maagaa muran loo dhaliya? Waa su'aal taagan

Haddaan taariikhda dib uraacay Sooyaalkana baaray eegayna wixii dhacay, waxaa iisoo baxay inaan weli loo bislaanin dowladnimada, waxaan arkaa inay waxbadan weli naga dhiman yihiin, balse gardarrooy, gardarooy gacalkaa waa.

Wax badan ayaan ku soo jirnay qas iyo qalaanqal, burbur hantiyadeed, naf iyo maalna ku weynay, waxaan ka xumahay meeshii aan ka qoomameyn lahayn in aan weli utaagan nahay una heellan nahay wixii foosha xumaa ee nasoo maray.

Maxaa gablan wiilla'aaneed iyo guri ba'ay la soo joogay, maxaa halyeey soomaaliyeed oo dalkaan iyo dadkaan wax badan u tari lahaa ciidda la hoos geeyay, ma godadkii abeesaa dad kale lala go,goobayaa? Soomaaliyeey aniga magaran arrintaas, balse waxaay ay la tahay in gumeysi weli fara ba'an nagu hayo.

Haddii la yaabo yaasiinka ayey soomaalidu tiraahdaa, waxaan arki jiray waagii hore culimo aad u nadiif ah oo daacad ilaahey ah oo ku wareegeysay guryaha shacabka soomaaliyeed, iyagoo irrid waliba gaarsiin jiray farriin ku saabsaneyd xaaladaha taagan in ay ilaah ka magan galaan waxayna dhihi jireen akhrista qur'aanka intaas iyo intaas sida Yaasiin Tabaarag iyo toddobada magangelyo, wax wanaagsan bay ahayd sida badanna waa laga gudbi jiray wixii abaar, mushkilad iyo xumaan soo socday.

Gardarrada iyo xumaantu waa xaaraan, dulmiga guud ahaantiisuba maahan wax wanaagsan, waxaana loo baahan yahay dadka walaalaha ah in ay iscafiyaan, isna gacan qaadaan si xumaantu u idlaato.

Khilaafku, waa wax jira, balse maahan in wax leysugu dhimo, ee waa in wax lagu saxaa.

Laakiin, khalad haddii khalad lagu saxo maxaa imaan kara? Arrimaha hadda socdaa maahan wax wanaagsan danna u ah ummadda soomaaliyeed.

Waa yaabe markii ay noo macaato ooy meel sare gaarto maxaa leysku maagaa oo murun loo dhaliyaa? Waa su'aal taagan oo ku wajahan kuwa aan samirka aqoonin ee har iyo habeen dowladda lugaha iyo gacmaha heysta.

Annagu soomaalibaan nahay waxaan dooneynaa dariiqa xalaasha ah ee dowlanimo, waxaan raacsannahay toobiyaha habboon ee dowladnimada hoggaaminta wanaagsan ee Nabad iyo Nolol.

Maanta anaa iri anaa taabsaday waxba keeni meyso, shacabka soomaaliyeed way ka soo daaleen wararka quutaquutada iyo deb baas kicinta, waxaan u baahannahay nasi iyo nolol iyo weliba geed harqaboow.

Nabad iyo Nolol, waxaa lagu raacay daacadnimadeeda iyo waddaninimadeeda, waana sidii hore loo yiri gugii da'idoona daruurtiisa la gartaa, waana mustaqbalka dalkaan gaarsiin doona horumarka iyo baraaraha.

Daan-daansiga dowladda Kenya, maahan wax hadda soo billowday, oo keenya dhul horaa ku maqan, marka si ay kaasi u xalaaleysato oo aan looga soo daba qeylin, waxay billaawday wixii la dhihi jiray ku qabso ku qadi meyside iyadoo ujeedku yahay badda iyo dhul cusub.

Istiraatiijiyada cusub ee Kenya dageyso maahan mid ay keli ku tahay oo waxaa iska cad in ay jiraan dowlado kale oo gadaal ka riixaya.

Marka arrimaha qulqulatooyinka ah ee ay Kenya ka waddo carriga soomaaliya. Waa arrin ay ka waddo cadaasis si aan uga tanasulno baddeenna kheyraadka badani ka buuxo.

Balse gilgilasho gantaal kaagama haro, waxaan dhowrnaaba waa Maxkamadda Caalamiga ah ee ICJ.

Haddaba, Waddaniga Soomaaliyeedoow ma saxbaa in aan keenya raalli uga noqonno hab dhaqanka waalan ee dhul iyo bad dhicidda Kenya ku socoto?.

Maxeyse naga mudan yihiin kuwa u hiillinaya Kenya ee ah kula jire kaa jiraha ah?

Horay soomaalidu u tiri Wallee gudin yahay ima goyseen haddii aan gabalkey kugu jirin.

Soomaaliyeey gef xumo geeriyaa ka roon, dheg xumana waa loo dhintaa, tanoo kalena waxay na soo xusuusineysaa ama ay taagan tahay maalintii gobonnimo doonka waxaana nagu habboon in aan u qaadno Axyaa waddani ayaa soomaali aheey, iyo dagaal aan loo kala harin annagoo hal mar ku qaadno (HANNOOLAATO) macnahaasi waa la garanayaa, waa sifeyn dhab ah si aan mar kale loo arag wax Soomaaliya soo damaaciya, waana keydka dhabta ah ee aannu heysanno.

Soomaalaay Kenya waa Waraabe, Waraabe dhashaada cunayana wheel kuuma noqon karo, Soomaalaay waranka iyo eebada haddaan wadnaha lagala dhicin wiirsi iyo wishishiqba nagama daayaan, dacar iyo waabayo kulul in la siiyo mooye waanada kaama qaataan, haddaba, soomaalaay Gumeystaha ka dhiidhiya, Wab haddaan layska dhihin ogoow kama baxo waabtaada.

Walaalka Waddaniga ahow, weligaa dalkaada, dadkaada iyo diintaaduba u hiilli' markay hiillada joogto, waayo waa waajib mar waliba ku saran. oo yaysan dhicin in aad ku beddelato sandareero yar iyo ballan qaadyo been ah.

Soomaalaay dalkaada wax kuu dhaamo maleh haddaba, Guuleysta inta Nabadda iyo dowladnimada jecel, Soomaaliya hanoolaato, Guul iyo gobannimo.

Qoraaga: Osman Dhiblaawe

# SOOMAALAAY CUNI WEYSAYE YAAN LAGUU CUNIN!!!



Amnigu waa lama huraan waxaana lagu sugaa Hoggaan daacad ah iyo xuquuq ciidan markii la helo waxaana ku toosaya horumarka amniga oo ku xiran Garsoor Caddaalad ah haddiise lawaayo Gacanti amniga oo wax soo qaban laheyd lama helayo Amni iyo kala dambeyn, waxaana halkaas ku fashilmaya hannaankii geediga Siyaasadeed oo looga fadhiyey amni iyo garsoor daacad ah.

Muddo badan ayaa Dalkeena Adduunka qarash ku bixiyey Qarammada midoobay iyo waddamada Islaamka intaba, iyadoo laga hirgaliyey Dowlado kmg ah iyo kuwo aan kmg aheyn intaba.

Dowlad kasta marka ay muddo shaqeyso waxaa ragaadiya khilaaf Siyaasadeed iyo wax isdaba marrin, dadka hadday talo waayaan kana qasmaan waddaniyadda iyo arrimaha diimeed, waxaa ka faa'iideysta Cadowgooda oo markii hore waayey meel uu umaro.

Dowladduna waxay mashquul ku noqotaa mar walba buufiska iyo hadallada kutiri kuteenta ah oo sal iyo raad midna aan laheyn sidii ay u baabi'in laheyd waxaana halkaa ku luma horumarkii iyo wax uqabadkii dalka iyo dadka.

Iyadoo goobaha sheekooyinka wax badan ay shacabku ku falanqeeyaan, waxaana ka mid ah waxyaabaha ay mar walba miiska soo saaraan: muranka iyo buuqa kasoo baxaya Ciidamada qalabka sida taasoo aysan u baran shacabkana ay dariiqada ku baandheeyaan waddooyinka iyo goobaha fadhi kudirirka.

Waxaa maqaalku Dhaka faar iyo madax wareer ka qaaday sida ay gacmaha ugula jiraan dadka wax ma garatada ah sirta Ciidanka iyo guud ahaan Dowladda, waxaana had iyo jeer arki jirnay arrimaha ciidammada, sirta culus ee Dowladda oo ku kooban xafiisyada Dowladda oo keliya, laakiin arrimahaa oo idil waxaa beentaa yiri aaladda casriga ah iyo taleefannada gacanta lagu sito iyo dhammaan warbaahinnada gudaha oo aysan u aaba yeelaynin waxa ay shacabka u sheegayaan.

Islamarkaa dadweynuhu waxa ay kala garan waayaan hadallada runta ah ee biyo kama dhibcaanka ah iyo kuwa beenta iyo xaalad abuurka u badan, intaa oo dhan marka lays weydiiyo waxay ku dhamaataa in qof waliba sida uu doonayo wax u sheego, haddii ay noqon lahaayeen kuwa kasoo horjeedo hannaanka Dowladnimo iyo kuwo kaloo daneystayaal ah intaba.

Mar walba waxaa jahwareer ku dhaca Shacabka markastoo qof walbo si aan xaqiiqda waafaqsaneyn wax ugu sheego.

Haddaba, Soomaalidu waxay ku maah maahda : Xalaal iftiinbaa la qashaa''

Iyadoo arrintaa laga shidaal qaadanayo soo mahaboona in Shacabka lasiiyo ilo warreedyo runta ka sheegaya waxaa dhabta ah ee ka turjumaya horumarka Waddanka oo ay Shacabkuna ku diirsadaan iyo xaaladda ka soo gudboonaatay meel kastoo ka mid ah Dalka, loogu gudbiyo dadkaas si ay u ogaadaan xaaladda dhabta ah ee ka jirta dhammaan deegaannada uu ka kooban yahay dalka.

Waa in xaruun loogu sameeyaa deegaan walba sida Gobolka, Degmada, Xaafadda iyo waax kasta iyo laamaheeda laguna magacaabo xafiiska isku xirka Shacabka iyo Dowladda.

Talo soo jeedin;

Haddii lala shaqeyn waayo ama ay shaqeyn weydo Dowladdu, waxaa laga yaabo in qarannimada halis gasho waxaa iman karta in dalkayaga la waayo magaciisa, lana oran doono halkaan waxaa degganaa qoom soomaali la dhihi jiray oo gacnahooda isku gumaaday ka dibna inta ka soo hertayna waxaa ku soo butaacay deriskooda oo ay ku milmeen.

Haddaba, waxaan nala gudboon inaa ka baxno dawarsiga shisheeyaha, kunoolaansho qaxootinimo waxba qabsan Karin, tuugsade haddaad noqoto, waxaa caalamka lagaaga bixinayaa ama laguugu magacaabayaa, kuwaas waa Duceeyeyaal aan loo duceyn, markii muddo badan qarash iyo deemo badan lagu siiyo wixii aad sheegtayna been noqdaan oo lagaa waayo kobac Dhaqaale mid siyaasadeed iyo waliba horumar Dowladeed, waxaa lagu leeyahay matashan karee haloo taliyo! Waxaana lagaala wareegaya dalkaan barwaaqada ceegaagto ee aad waxba kasoo saaran weyday, markii aad arki weydeen hareerahiinna waxa ka socda, malafsiga iyo damaca deriskaada ka qabo burburkaada iyo siday urabaan in ay ku kala dafaan.

Dalkeena waxaa lawada ogyahay inuu yahay keydkii Barriga Afrika waxaana muddo badan sahminaayey mareykanka, Shiinaha, Midowgii suufiyeeti, Ingiriiska iyo Talyaaniga oo ahaa Milkiilayaashii Barriga afrika oo muddo dheer soo gumeysanaayey.

Haddaba Soomaaliyeey waxaa la yiri Cuni waysaye waa laguu cuni! Waa hubaal Talo walaal diide turaanturro ma huro!

Suugaanta toddobaadkan waa (Dalku wuxuu hagaagaa)

Dalka wuxuu hagaagaa<br>
dadkuna nabad kuseexdaa<br>
qarnimadu deeqdaa<br>
markii horumar doonaan<br>
dib udhacana diidaan<br>
denbiilaha qabtaanoo<br>
danta guud texgeliyaan<br>
Dunidu waxay israacdaa<br>
markay daqar kuyaaliyo<br>
daaweeyaan wixii hore<br>
waliba ay dardaarmaan,<br>
midnimaa wax deeqdee<br>
haddii aadan doodiyo<br>
aadan garan dabuubtaa<br>
marku daadku kulatago<br>
dawo mala sheekadu<br>
Soomaalaay isdaba qabo<br>
Daacad iyo ismaqalbaa<br>
dowlad lagu hantaayoo<br>
duunyadu ku badataa<br>
oo dalag la beertiyoo<br>
doog kuu baxaayoo<br>
duur joogta badan iyo<br>
deeradii iyo cowshuna<br>
neecaaw dareeman.<br>
Markaana qaran difaaciyo<br>
dabaabaadka xoogga leh<br>
dusha sare ka joogaan<br>
nabad bay dakeeyaan.

W/Q: Abwaan C/salaam Axmed Gabeyre

FAALLO & FALANQEYN

W/Q:
Cabdirisaaq Absuge

# WAREERKA SIYAASADEED WAXAA KEENAY WADAADDO!!



Gumaysigii kaddib iyo markii xornimada la qaatay, waxaa soo buuxiyey booskii uu baneeyey ninka cad dad Soomaaliyeed oo aqoonta maamulka iyo maaraynta ku yar tahay una bislayn hannaanka iyo sida wax loo hoggaamiyo.

Hay'adihii dawladda oo dhan kuraastoodii waxaa ku wada fariistay duul aan aqoon u lahayn jaangooyn siyaasdeed iyo mid dhaqaale, waxaana durbadiiba biloowday maamul xumo aan horay loo arki jirin intii uu joogay Ninka cad kana mid yihiin yaan lagaa badsan hantida dadwaynaha, iyada oo aan loo arkaynin in hantida guud ee umadda ay xaaraan tahay cunisteeda, waxay shacabka Soomaaliyeed arkeen in maamulladii gumaysiga ka dambeeyey ay la yimaadeen wax aan ku wanaagsanayn Diinta iyo dhaqanka Soomaalida, kana dhawrsan jireen maamulkii gumaysiga

Waxaa la arkay Eex iyo nin jeclaysi aan qarsoodi ahayn oo madaxdii waagaas iyo maamulkoodii ka soo muuqday,waxaa batay boobkii hantida guud, musuqmaasuq xad dhaaf ah iyo tacadiyo dadka qaar iyo qabaa'illada Soomaalida loo gaysanayey.

Arintaas waxaa fiirsan waayey wax ka qabshadeedana u fududayd Ciidanka Milatariga Soomaaliyeed oo ka nadiif ah wax badan oo gudaha rayidka ka dhex jiray, sida qabyaaldda,Laaluushka,Qaraabokiilka, iyo maamul xumo qara wayn.

Nimankii tuutaha iyo qoriga baynaadda sitay waxay dalka ku qabsadeen Inqilaab aan dhiig ku daadan, 1969-kii si ay uga badbaadiyaan haadaanta uu waayahaasi dalka ku sii shalwanayey.

Nasiib darro inkastoo ciidanku 7dii sano ee ugu horaysay xukunkooda iyo taladooda la mahadiyey, wax badan oo khaldanaana ay saxeen haddana ciidankii badbaadada ee loo hanwaynaa waxaa isagana ku dhacay cudurkii qabyaaladda iyo nin tooxsiga, waxayna wanaagoodii hore ka daba marinyeen wax aan u wanaagsanayn shacabka Soomaaliyeed dhagahooda iyo indhahooda oo mudnaa in laga ilaaliyo maqalkooda iyo argooda.

Soomaalidu markii ay arkeen maamulkii ka dambeeyey Gumaysiga isla markaana ay arkeen maamulkii ciidanka Milatariga iyo sidii uu ku dambeeyey ayay guux bilaabeen iyaga oo si muuqata u dhahaya dalkeena waxa kaliya ee lagu maamuli karo uguna mudan waa Kitaabka ilaaheey iyo Sunnada Rasuulka Csw.

Waa dhab waana run calaacalka bulshada ka soo yeeray waagaas, laakiin markii ay Arintaas ay maqleen wadaaddadii Mawlacyada iyo masaajiddada ku gaajaysnayd maxaa Dhacay? waxay wadaaddadii u arkeen in warkaas iyo guuxa dadwaynaha ka soo yeeraya ay uga bannaan tahay fursad qaali ah oo in la lumiyo aan mudnayn.

Waxaa hal mar siyaasdii ku soo xoomay qaar wadaaddadii ka mid ah oo markaas ugu aragtida dheeraa, Sida Ururradii Wahaabiyada, Al Islaax, Aala Sheekh, iyo qaar yar oo ku dhex qarsoonaa loogana jeedin gudahooda oo ahaa Qawaarij mayal adag oo ay kuwaas ku sii dhexjiraan xayn Takfiiriyiin ah oo dhamaantood dararka ay biyaha ka cabaan kuwada yaaliin qaar ka mid ah waddamada Carabta gaar ahaan Qaliijka Carabta---iyaga oo aan hal baal xitaa ka aqoon habka iyo hanaanka loo dabaqo Kitaabka quraanka ah waxna ka aqoon waxa dunnida kale ka jira ee afkaaro iyo falsafado ah lana doonayo in la waafajiyo hanaanka Kitaabka Quraanka ah loogu dhex dabaqayo dadkeena Soomaaliyeed ee wada Dogmada ah.

Mar kaliya ayaa magaalada Muqdisho laga dhex maqlay iyada oo aysan ka marnayn laablakac, indha la'aan iyo dhago la'aan loo wada jeedo Allaahu Akbar aan aqoon la jirin oo iska caadifad ah, oo aan la ogayn in kalmadaas qiimaha leh ay rag cad-cad iyo qaar kaloo midabkeena leh ay dhufays ugu jiraan si ay uga taqalusaan Allaahu Akbarta xaqa ah iyo dadkeedaba.

Alaahu Akbar waa kalmad xaq ah, waa kalimadda kaliya oo dalkeena u keeni karta haddii si dhab ah loo dhaho, loo fahmo, loona dabaqo cadaalad iyo dawladnimo run ah, laakiin raggii kalmadaas fulin lahaa oo xaqiijin lahaa miraheeda ma ahayn wadaaddadii ku soo xoomay siyaasdda Soomaaliya ee hunguriga uga jiray kaliya in ay maamulka dalka horboodaan.

Kuma jirin qaluubta wadaaddaas daacadnimo Diineed, Xilkasnimo, Aqoon dhamaystiran Iyo Dulqaad looga baahan yahay cid kasta oo diinta islaamka xambaarta in ay la timaado.

Fiiri: in shareecada islaamka dalka lagu dhaqo iska daaye, wadaaddadii soo qamaamay ee shacbigeena u sacaba tumayeen, iyagii laga sugayey in ay wax hagaajiyaan ayuu cadwga dadkeena iyo Diinteena kala qaybiyey Aqoon-daradooda awgeed oo qoloba meel ka soo jeediyey, hubna isugu dhiibay, waxaana dalka mar kale ka biloowday Tawrad dagaal cusub kana duwan kii qabiilka oo markaas laga qayla dhaaminayey kana dabar gooyn, dad layn iyo burbur badan xagga degaanka dagaal kasta oo dalkeena soo maray.

Umadda Soomaaliyeed goor dambe ayay ku soo baraaheen in wadaaddadu ay ka sii xun yihiin xagga maamulka hoggaamiye kooxeedyadii horay shacabka u soo dulaystay, wadaaddadu waxay la yimaadeen qaab dagaal oo aan horay loo arag iyo dil Nuuc cusub ah oo ay kula dul kufeen shacbiga Soomaaliyeed ee Masaakiinta ah

Matalan: si ay shacabka u cabsi galiyaan uguna abuuraan argagax ay la seexan waayaan si ay danahooda uga dhex fushadaan gudaha shacabka waxay wadaaddadu dilayeen qof kasta oo waxtar iyo indho u ah bulshada iyaga oo iska ilaalinaya in iyaga laga doorbido,

Waxay wadaadadu keeneen dhaqan ku cusub dagaallada Soomaalidu taqaanay sida is Miidaamin,is qarxin qof nool, in qofka sida xoolaha loo gawraco, iyo in qofka inta banziin lagu bilbilo ka dibna dab lagu daayo ama kabriid lagu ololiyo iyo nuucyo dil oo aysan Soomaalidii hore aqoon kana yaabiyey kuwa haatan Jooga.

Sidoo kale, markii la fahmay in wadaaddadii wahaabyada u badnaa oo diinta ku Owrkacsanayey oo rabay in xukunka ay ku gaaraan ayaa haddana waxaa soo baxay wadaaddo kale oo u badnaa kuwii dariiqada Sida Axmadiyada iyo saalixiyada Iwm iyaga oo ka masaysran Wahaabiyiinta, lana dabaaqtamaya si aan bulshada oo dhan looga kaxaysan, ayay la baxeen Urur wayne ay ula baxeen Sunna Wal Jamaaca kuwaas oo isku balaariyey qaybo badan oo ka mid ah Koonfurta Soomaaliya, si wanaagsana isu hubeeyey- dagaallo badan oo ku dhex maray gudaha Koonfurta Soomaaliya waxay Xertii Mawlacyada la yimaadeen iska caabin aysan horay u arag wahaabiyadii is mahadisay ee horay uga soo adkaatay Hoggaamiye kooxeedyadii Miciyaha waawaynaa, inkasta oo labada qolo midna tan kale ka adkaan oo weli loolankoodii uu ka jiro dalka Soomaaliya.

Taariikhaha adduunka guud ahaan markaad dib u fiiriso iyo kuwa ummadaha kale ee inaga da'da weyn waxaa la ogaaday in dhibaatooyinka iyo dagaalladu soo jireen ahaayeen, dagaalkuna waxa uu ahaa wax mar kasta iyo bulsho kasta ka dhex dhici jiray oo si ujeeddooyin leh oo wakhtiga, maalka, nafta,iyo tamarta ku bixi jirtayba qadarnaayeen oo xisaab ku socdeen.

Haddaba, nafta qofka bini Aadamka ah oo waxa adduunka saaran ugu qiimo badan ayaa loo huri jirey si ujeeddo loo gaadho,sida badanna ujeedadaas ninka dagaallamaya isaga ayaa go'aankeeda kama dambaysta ah iska lahaa wuxuuna u dhimanayey in uu mustaqbal sharafeed uga tago Awlaaddiisa, Diintiisa iyo wadankiisa laakiin dadka Soomaalida layiraahdo markaad dhab ugu fiirsato taasi way ka maqan tahay.

Waxaa la ogaaday in farqiyada dagaallada qabiil la dhamayn karo iyo dhamaan wixii hoos yimaado sida dagaallada degaanka lagu dagaalamo, midka Daaqa, iyo kan biyaha lagu dagaallamo, hase ahaatee dagaalka Diineed iyo firqooyinka uusan dhamaad lahayn ilaa mid soo harto inta kalana Boorka la cabsiiyo macnaha la dabargooyo.

Haddaba, waxaan qof ahaan dhihi karaa in kulaylka iyo kadeedka Soomaaliya hadda uun uu kaw yahay, loona baahan yahay inta goori goor tahay laga hor tago si ay firqooyinka hadda jira aysan maraaro u yeelan loona soo celiyo sidii markii hore soomaalida ahaan jirtay oo aan kala qaybsanaanta ku jirin.

Waana laga shaqayn karaa haddii dhug la yeesho, loona xulo dad dadnimada qiimeeya iyo kuwa dareenka diineed ee xalaasha ah haysta ay ka hawlgalaan wax ka qabshada arintaas.

W/ Q: C/risaaq Axmed Absuge

# ISLAAMKA IYO NOLOSHA

## SIFOOYINKA JANNADA & NAARTA

Waxaa laga wariyay Caa'isha Bintu Abuu Bakar, Alle raalli ha ka noqdee, in Nebiga (Scw) yiri: Haddii Alle doono in uu geliyo Ahlu Jannaha Jannada, wuxuu u diraa Malag isagoo wata Haddiyad iyo Lebiskii Jannada.

Markay doonaan ahlu Jannahii inay galaan Jannada, wuxuu ku leeyahay Malaggii, Aniga waxaan idiin haya Haddiyad ka timid Rabbul Caalamiinka, ka dib Ahlu Jannihii waxay leeyihiin Maxay tahay Haddiyaddaa?

Malaggii wuxuu leeyahay Haddiyaddu waa toban (10) Faraanti oo ay ku qoran yihiin:-

Nabad-gelyo Korkiina ha ahaato, waad wanaagsanaateen, gala Jannada idinkoo ku waaraya.

Waa la idinka kor yeelay Murug iyo Tiiraanyo

Tani waa Jannadii ee la idiin dhaxalsiiyay wixii aad Camal fasheen

Waxaan idiin sowjeynay Xuuralceyn, waxaana idinku Abaal-marinay maanta Sabarkiinii, waxaadna tihiin kuwa liibaanay.

Kani waa jisahiina, maanta wixii dhaaco ah ee aad fasheen.

Waxaad noqoteen dhallinyaro, mana gaboobeysaan abidkiin.

Waxaad noqoteen kuwo Aamin ah.

Waxaad haleesheen Anbiyada, Siddiiqiintii, Shuhaddadii iyo Saalixiinta.

10-Waxaad ag degteen derisyada Raxmaanka leh Carshiga sharafta.

Dabadeed wuxuu leeyahay Malaggii, gala Jannada idinkoo Nabad galay, aamin ah.

Markaas ayey ahlu Jannaha gelayaan Jannada, waxayna Oranayaan, Allaa Mahad leh, Allahii naga qaaday murugtii, rabigeen waa mid dembi dhaafid iyo Shukri badan ee na dhaxalsiiyay dhulka Jannada, aannu degeyno Jannada, aanu ka degeyno Jannada meeshii aan doonno, waxaa nicmo lahaaday ajarka caamiliinta.

Sidoo kale, waxaa laga weriyay Caa'isha bintu Bakar Alle ha ka raali noqdo in Nebiga (Scw) yiri, haddii Alle doono inuu geliyo Ahlu Naarka Naarta, wuxuu u soo diraa Malag, isaga sida 10 Faraati, oo ay kula qoran yihiin:

Gala Naarta, mana dhimaneysaan weligiin

Dhax dabaasha Cadaabta, raaxo idiinma sugnaan

Ka quusta raxmaddeyda

Gala Naarta, idinkoo murugeysan, tiiraanyeysan weligiin

Lebiskiinu waa Naar, Cuntadiinu waa Saquum, Sharaabkiinuna waa biyo kulul, gogoshiina waa Naar, hungurigiina waa naar.

Kani waa jisahiina maanta wixii aad fashaan ee macsiiyo ah.

Caradeyda korkiina waa naarta dhexdeeda Abadan.

Korkiina Nacalad ayaa ah, waxaad u qasadeen ee dunuub ah waa weyn ah, oo ayada ka dowba keenin, kana shallaynin.

Hoggaamiyeyaashiinu waa shayaadiin Naarta dhexdeeda Abaddan.

Waxaad raacdeen sheydaan, waxaad doonteen Adduunyo, waadna ka takteen Aakhiro, kanina waa Jisahiina.

Sifada Jannada iyo Sifada Naarta.

Sifada Jannadu Waa: Jannadu, waxay ku taallaa Samaawaadka Toddobada ah korkooda, waxaana ka sugnaaday Nebigeenna (Scw) inay tahay Jannadu Samaawaadka korkooda iyo Carshiga hoostiisa, waxaa la yiri, Jannadu waxay leedahay Sideed (8) Albaab, Albaab-kastana waxaa ka gelaya Toddobaadan Kun (70,000) oo rag ah, sifadoodu waa isku mid, waa guryo la isasaaray dhismahooda, waxay leeyihiin qolol waasac ah, oo la iswada arkayo kor iyo hoos oo dahab iyo fiddo ah, Sabarjadu Samrad, Lu'lu', Murjaan, Kaafuur, iyo Canbar iyo wixii la mid ah ee Jawaahir ah ee lagu raaxeysto, Allahayoow Nagu dar kuwa Ahlu Jannaha ah.

Aamiin, Aamiin, Aamiin.

Sifada Naarta.

Sifada Naarta, wuxuu yiri Ibnu Rajab (Rc) Naartu inay tahay Toddobada (7) dhul hoostooda, oo ay haddaba jirto.

Nebiga (Scw) wuxuu yiri, Jahannamo waxaa ah Toddobaatan (70) kun waadi.

Waadi kasta, wuxuu leeyahay toddobaatan (70,000) kun shucub,

Shucubkastana toddobaatan (70,000) kun daarood

Daar-kastana, waxay leedahay toddobaatan (70,000) kun Beyda ma guri.

Baydkastana, wuxuu leeyahay toddobaatan (70,000) kun Ceel

Ceelkastana, wuxuu leeyahay toddobaatan (70,000) kun Abeeso

Fuq kasta ee Abeesada ah, wuxuu leeyahay toddobaatan (70,000) kun oo miciyood.

Maka fakanayo, kaafir iyo munaafaq inuu ku dhaco kuwaasi dhammaantood, Alloow naga badbaadi.

Aamiin, Aamiin, Aamiin.

## QISAS KA SUGNAADAY RASUULKEENA (SCW)

### Xaakim ayaa ka wariyey Abuu Muusaa in uu yiri:

Rasuulka (SCW) ayaa ku soo degay nin reer miyi ah, markaas ayuu karaameeyay.

Markaas ayuu Nabigu (SCW) ku yiri: (ninka reer miyiga ahow i weydiiso dantaada).

Markaas ayuu yiri laba jeer: Rasuulka Alloow: hal reeryaysan iyo riyo reeruhu ii maalaan. Markaas ayaa Rasuulku (SCW) ku yiri: ( war ma kari weyday in aad noqotid habartii reer Banii Israa'iil oo kale?).

Deeto asxaabtii ayaa waxay dheheen: Rasuulka Alloow (SCW) maxay ahayd habarta reer Banii Israa'iil..?

Markasuu yiri: (Muuse ayaa doonay in uu reer Banii Israa'iil la boxo, markaasuu jidkii ka dhumay, markaasay culimadii reer Banii Israa'iil ku dheheen: Annagaa kuu sheegayna ee Yuusuf ayaa ballan Ilaahay nagaga qaaday in aanaan Masar ka bixin ilaa aan lafihiisa qaadno.

Markaas ayuu yiri: qofkiinee yaqaan qabriga Yuusuf?. Waxay dheheen: qabriga Yuusuf cid aan habarta reer Banii Israa'iil ahayni ma yaqaan, markaas ayuu u cid diray, wuxuuna ku yiri: I tus qabriga Yuusuf.

Markaasay ku tiri: Wallaahi in aanan yeelayn ilaa aan jannada kula galo. Nabigu (SCW) wuxuu yiri: (wuu dhibsaday Rasuulkii hadalkeedii, markaas ayaa lagu yiri: sii dalabkeeda, markaasuu siiyay, markaasay timid badyaro (meel biyuhu ku uruuraan) markaasay tiri: dhura biyahaan, markay dhureen ayay ku tiri: qoda halkaan, markay qodeena waxaa ku jira lafihii Yuusuf. Markii ay dhulka ka qaadeenna waddadii waxay u noqotay sida iftiinka maalinta oo kale.

Maxaan ka faa'iidaysanaynaa xadiiskaan..?

Waxaynu sheegnay in sheekada warinteeda diintu ka leedahay ujeeddo la doonayo in lagu gaaro. Ujeeddada ugu weyni waa in cibro iyo waansamid laga qaato oo hadday wanaagsan tahayna lagu daydo, hadday xun tahayna laga dheeraado. Hadaba aynu eegno qaar ka mid ah faa'iidooyinka xadiisku xambaarsan yahay.

1. Martigalintu waa wax xaq loogu leeyahay qofka muslimka ah. Mu'minka waxaa saaran in uu karaameeyo martidiisa, waana sida uu yeelay ninkaas saxaabiga ah oo reer baadiyaha ahaa.

2. Diinteennu waxay inagu boorisay in qofka ixsaan loo galo uu ka abaalgudo, duca kaliyaba Alle ha ka dhigee, waana arrin dhaqan u ahayd Rasuulkeenna (SCW), sidaa darteed ayuu ku yiri ninkii marti sooray oo karaameeyay: sheego dantaada.

3. Ninkii ma haleelin in uu Rasuulka wax weyn oo adduun iyo aakhiro anfaca weydiisto ee wuxuu su'aashay wax yar oo adduunyo kaliya ah. Taasna Rasuulku (SCW) ma garaysan; maxaa yeelay nin mu'min ah oo og in uu Rasuulkii (SCW) dalab u sheeganayo ma qabato in uu wax sidaa u hooseeya sheegto, illeyn mu'minka waxaa lagu yaqaanay hanweyni iyo inuu meel sare ka fakaro.

Kolkaas ayaa Nabigu (SCW) tusay asxaabtii in sida habartaas loo hanweynaado ee aan wax liita hadaf laga dhigan.

4. Ninkaan reer baadiyaha ahi Nabiga (SCW) wuxuu weydiistay wax xalaal ah oo uu u baahnaa, Nabiguna (SCW) wax ka weyn oo ka qiimo badan ayuu la doonayay ee inuu xumaan sameeyay kuma sheegin.

Haddaba, maxay kula tahay nin weyn oo subax walba u soo kallahaya in uu dadka waydiisto wax marka horena xaaraan ah, haddana wax yar oo liita sii ah, sida: Qaad iyo kii lagu Qiicin lahaa?.

5. Waxaa saaran culimada iyo hoggaanka ummadda in ay ogaadaan in jabka iyo dib u dhaca ummadda haysta uu xaggeeda ka yimid oo ay darsaan asbaabta keentay; si xal loogu helo ee aanay inta indhaha isku qabsadaan oran waan saxanahaye soo socda ama hadba meel cusub oo waxa ka soo bixi doona aan la ogayn aanay wejiga ku diirin.

6. Qisadaani waxay tusaysaa qiimaha cilmigu leeyahay iyo sida loo qadarinayo qofka cilmiga leh.

Waxay kale oo tusaysaa haddii dadka cilmiga leh aan aqoontooda iyo ra'yigooda la tixgalin in la dhumayo.

Ninkii yiraahda waan ka maarmayaana in uu meel mugdi ah oo haadaan ah wax ka tuurayo.

Eeg Nabigii Ilaahay ayaa ku khasbanaaday in uu habar wax weydiiyo oo waliba ay shuruud ku xiraysaa, isna ka yeelayaa; si uu dadkiisa jid toosan u mariyo. Ka waran haddii la yiraahdo waa habare inaga daaya?.

7. In ay ummadihii hore ku jireen dad khayrka aad ugu han weyn sida habrtaan. Asxaabta Nabigeenana (SCW) dhaqan bay u ahayd in ay ka fakaraan oo raadshaan meelo sare. Tusaale ahaan: markuu Nabigu (SCW) ka waramay todobaatan kun oo ummaddiisa ah oo jannada xisaab la'aan iyo cadaab la'aan galaya, waxaa soo booday Cukaasha ibnu mixsan oo yiri: Rasuulka Alloow (SCW) Alle ii bari in uu igu daro.

Markaas ayaa Nabigu (SCW) ku yiri: ka mid ayaad tahay. Sidoo kale markii Nabigu (SCW) sheegay in jannadu leedahay siddeed albaab ayuu yiri Abuubakar: qofna ma looga yeerayaa albaabadaas oo dhan?.

Nabigu wuxuu ku yiri: waxaan rajaynayaa in aad ka mid noqotid. Waxaa kale oo jiray nin saxaabi ah oo Nabigu ku yiri: I weydiiso, isna weydiistay in uu jannada kula rafiiqo Nabiga (SCW), markaasuu ku yiri: (iigu kaalmee sujuud badan). Saxaabigaasi wax janno ka yar wuu ku qanci waayay.

8. In ay dumarka ku jiraan qaar ragga badankiisa khayrka kaga han weyn oo jannada iyo raallinimada Alle uga dadaal badan, sida habartaan oo kale. Waxaa xusid mudan in dumarkii asxaabtu sidaa oo kale ahaayeen, sida:

Ummu Suleym binti milxaan oo markii Nabigu (SCW) isaga oo gurigeeda jiifa uu soo toosay isaga oo qoslaya, markay weydiisay sababta uu la qoslayana wuxuu yiri: dad asxaabtayda ka mid ah oo badda fuulaya iyaga oo jidka Ilaahay ku duulaya, markaasay ku tiri: Rasuulka Allow (SCW) Alle ii bari in uu igu daro, markaasuu ku yiri: waad ku jirtaa.

Waxaa iyana soo qaadis mudan saxaabiyaddii sarcaha qabtay oo Rasuulka ku tiri: ii ducee oo uu ku yiri: kala dooro in aan kuu duceeyo oo aad biskootid iyo inaad sabartid oo aad jannada gashid, markaasay doortay jannada,

Nabigana (SCW) waxay weydiisatay in uu u duceeyo si aysan u faydmin cawradeedu markii ay suuxdo, wuuna u duceeyay oo markay suuxdo ma faydmi jirin.

Haddaba soo gabdheheenna maanta lama gudboona inay ku daydaan dadkaas qiimaha badan?, miyayse qabataa inay cumrigooda ku dhammeeyaan daah, sariir, dhoof iyo sheeko baraley?.

Maya oo gabdhahayagu intaa ka qiima badan ee Alle ha u siyaadiyo wanaagga.

9. Qisadani waxay tusaysaa sida Rasuulku (SCW) uu asxaabtiisa iyo ummaddiisa ula jeclaa khayrka iyo han weynida, uuna ugu boorin jiray mar kasta oo fursadi soo marto raadinta darajooyin sare, tusaale ahaan wuxuu ku yiri asxaabta: haddaad Alle janno weydiisataan Firdawsa weydiista maxaa yeelay; waa meesha jannada ugu sarraysa, uguna wanaagsan, webiyada jannaduna ka soo burqadaan.

10. Qisadaani waxay ka mid tahay mucjisooyinka Rasuulka (SCW); maxaa yeelay waa wax ghayb ah oo in Rabbi u sheega mooyee aanu si kale ku ogaan Karin illeyn qisada habartu kumaba taal tawraadda hadda Yuhuuddu haysato.

11. Dadka waxaa ku dhaca tawfiiq la'aan hadday fulin waayaan amarka Ilaahay. Eeg reer Banii Israa'il oo Nabi Muuse la socdo ayaa jidkii ka dhumay dardaarankii Nabi Yuusuf oo la fulin waayay awgi. Waxaa la mid ah markii qaar asxaabta ka mid ahi khilaafeen amarkii Rasuulka (SCW) maalintii Uxud muslimiintii oo dhan ayaa dagaalkii ku jabay iyagoo Nabigii (SCW) la joogo.

Fiiro Gaar

In lafihii Nabi Yuusuf la soo saaray macneheedu ma aha in jirka intii kale baaba'day ee waxaa looga jeedaa in meydkii oo dhan laga soo saaray qabrigii; maxaa yeelay Nabigeenna (scw) ayaa sheegay in Ilaahay dhulka ka xaaraameeyay in uu cuno jirka Nabiyaasha.

# ARRIMAHA BULSHADA

## DAGAAL WAXAA LAGA DHAXLAA BAA'BA IYO BARAKAC

Waxaa mar waliba sharaf iyo ammaan iyo in lagu bogaadiyo mudan madaxda sare ee dalka sida ay ugu qeyb qaateen joojinta iyo ka hortagga dhibaatooyinka Dagaal beeleedyada ka qarxay qeybo ka mid ah Gobollada Hiiraan iyo Gal gaduudda Waqooyi, taasoo Madaxda ay u fuulleen Geed sare iyo mid hooseba ayaa si looga gaaro heshiis mirro dhal ah, waxayna ku mutaystaan mas'uuliyiinta arrintaas oo kale ka shaqeeya taariikh wanaag iyo magac sharaf leh oo ay ka helaan Bulshada dhexdeeda.

Geesiga waxaa lagu yaqaannaa in markii ay soo cusboonaadaan arrimahan oo kale kuwaasoo dadka iyo dalkaba dhibaato ku ah, inuu ka qaato dowr muhiim ah is la markaasna u damqado dalkiisa iyo dadkiisa ee uu mas'uulka ka yahay oo uu dantiisa gaarka ka hormariyo midda dadkiisa oo ma'suulka ka yahay taasoo adduun iyo aakhiro magac iyo abaal marrinba uu ka helaayo.

Waxaa kaloo wada ognahay markay dhacaan dagaallo sidan oo kale ah inay xagal daaciyaan arrimaha nabadeynta iyo kuwada noolaanshaha Deegaanka, haddii ayse billaabato dhinac kasta haka timaado Gobollaysi iyo Deegaan sheegasho, waxaa dhacaya Dagaallo lagu riiqdo oo naf iyo maalba burburiya waxayna ceyb ku tahay madaxda hoggaamisa Siyaasadda Dalka, haddii ay maareyn waayaan sida ugu dhaqsiyaha badan, waxay dagaaladaasi dhaxal siiyaan baab'a iyo kala fogaansho, tashwiish Siyaasadeed iyo kala aamin bax golayaasha laftigooda ay madaxa isla galaan asigoo mid waliba Gobol difaacaya waxaana aakhirkii burbura Qaranka, waana sidii hadda ka hor ku dhacday Dalka Soomaaliya.

waxaa kaloo digniin in laga baxsho u baahan awood sheegashada Maamul Gobolleedyada dalka oo aan lashaqeynaynin Dowladda dhexe, marka loo abtiriyo sida ay nala rabaan tabcanayaasha shisheeye si aynan u noqon Qaran awood leh oo shaqeeya iskuna filan oo adduunka tixgeliyo ayaa waxay doonayaan inay noo kala qeybiyaan sidan soo socota:

Baki state, Saaxil state, Somaliland state, Sool state, Qatumo state, Puntland state, Gal-mudug state, Hir-shabeellle state, Banaadir state, Jubbaland state, Koonfur galbeed state, marka state.

haddaba, marka loo qeybiyo dalkeena sidaa iyo si lamid ah waxay ka dhibaato badan tahay Soomaali oo qabiilba qabiil ku duulay, waxaa kaloo meesha ka baxaya is jaceylka iyo isku xirnaansha Ummadda Soomaaliyewed is difaaca iyo xoogga midnimo waxaa si sahlan gobol walbo u raaci doonaa Cadow kasta oo san dareerto u daadiya ama laac u jabiya halkaasna waxaa ka imaan doona in kooxdii yarba cadowgeedu meel ku ceshado kuwa kalena indhaha un ka fiirsadaan, taasina waxay ka dhigan tahay waxba nagama dhexeeyaan annaga iyo Gobollada kale.

Haddaba si ay taasi u dhicin waa in laga hor tagaa gobollaysiga, qabyaaladda, deegaan sheegashada iyo sohdimaha gaarka ah.

W/Q: Abwaan C/salaam Axmed Gabeyre



## SOOMAALAAY TASHI IYO TALO WADAAG!!!

Yaa dowlad noqon kara? Dowlad waxaa noqon kara shacab ka nadiif ah

qabyaalad, Shacab isku raacay danta rabitaanka Qarannimo, Midnimo,

iskaashi iyo wada jir, Waddaniyiin daacad u ah Dalka,Dadka iyo Diinta kuwaas

oo qalinka wada saaray inay Dowlad noqdaan, Cuddudooda oo mideysanna ku qaabila cadawga maangaabka ah ee doonaya inuu kala fur-furo Waddaniyiinta dhaxda u xirtay inay Soomaaliya ka saaraan mixnada ay dhex taallo, dibna ugu soo celshaan waqtigii dahabiga ahaa ee ka lumay.

Haddii aad fiiriso socod xumida Dadka qaarkiis, waxaad arkeysaa inaysanba rabin dowladnimo iyo kala dambeyn, kuwa lugaha heysta dowladnimada waxaan leenahay Qaran iyo qabiil meel miyay wada geli karaan?, qaar baa waxay aaminsan yihiin in sidaasba ay iska tahay Dowladnimada, Maya sidaas way ka duwan tahay wayna sarreysaa Dowladnimadu.

Dowladnimadu waa shey qaali ah, waxay ummaddeenu u soo joogeen wax badan way arkeen dowlad la'aan iyo dowlad xumi faraha looga gubtay.

Si kastaba arrintu ha ahaatee, Waxgaradka Soomaali ee Waddaniga ah wuu ogyahay runta inay tahay wax qiimo badan Dowladnimada, waxaa la yiraahdaa Dowlad xun waxay dhaantaa Dowlad la'aan.

Sidaan horeyba u soo aragnay Dadku way is cunayaan haddaan loo helin wax kala haga oo kala celiya, qof walibana wuxuu sameynayaa wixii uu isagu doono taasi sow Khalad la soo maray maaha?.

Haddaba, sow kuma habboona inaan wax badan ka fekerno wixii la soo maray?

Caqliga saliimka ah ee saafiga ah ayaa wuxuu noo sheegayaa in aan gurigeenna boorka ka jafjafanno, wixii naga hallaabayna dib u hagaagsanno, sow kuma habboona inaan taageeno garab istaagno Dowladdeenna haba noo tabar yaraatee?.

Sideen ku gaari karnaa Dowladaha horumaray, iyadoo la ogyahay heerka aan taagan nahay xataa Afrika, sida runta ah innagaa is-dhignay halka aan naalo, qof moogna naguma jiro, maahan in indhahaa leyska rido, .

waan ka soo bixi karnaa xaqiiqdii haddaan iskaashanno oo gacmaha isqabsanno ceelka gunta dheer ee aan dhex jiifno, laakiin tafaraaruqa kuma gaareyno halka la tiigsanayo.

Waxaa xaqiiqo ah inaan reer Hebel iyo Hebel, Nin tooxsi aanan melena lagu gaareynin, Geeddiga socdaa qof keligii ma wadi karo wanaagsan in mar Jaanta leysla qaado si guryo samo loogu furto rarka, diifta iyo daruufta naga muuqata ee nagu raagtayna si looga gudbo oo looga baxo.

Sida aan ognahay annagoo dhan waan daallanahay, waxaan u baahannahay meelaan ku nasanno, sideen ku heli karnaa haddii aanan taageerin dowladnimo?, Sida dhabta ah waan u baahannahay Dowladnimada iyo Qarannimada waa inaan taageernaa Midnimada iyo wada jirka Ummadda Soomaaliyeed, waa inaan soo dhacsannaa xaquuqaha nooga maqan Dibadda, Yaa noo soo dhicin kara? Ma Reer Hebel ayaa soo dhicin kara waa maya, waxaa soo dhicin kara annagoo wada jirna oo dowladdeena garab istaagno.

Muuqaalka Dunnida ee aan kaga jirno meesha hoose, waa inaan wada arki karnaa si aan sumcaddeenna dhuntay dib ugu soo ceshano waa inla karaar qaataa.

Haddii aanan sidaa yeelin Soomaaliyeey waxaan noqon doonnaa qowmiyad dhuntay oo waxaa la oran doonaa waxaa beri jiri-jiray Dad iyo Dal Soomaali la yiraahdo oo iyaga gacantooda isku baabi'yay.

Haddii kale, waxa dhici kartaba in la yiraahdo kuwani waa waxuush dowladnimo ma istaahilaan ee maxmiyad cusub hala geliyo, waayo way tashan waayeen.

Soomaali weyney tasho iskuna tasho, sida runta ah hadaad tashan weydo Ogoow waa laguu talin doonaa.

W/Q: Osman Dhiblaawe.

## CIYAALKA KOOLO DHUUQYADA OO SII BADANAYA.

Ciyaalka derbi-jiifka iyo kuwa dayacan oo noqday Dibjirro ayaa runtii soo kordhay beryahan dambe, Muqdishu markaad u kuurgasho waxaa ku soo batay ciyaalka dhuuqa koollada oo aan garan waayay halka ay ka soo iibsadaan Koollada, sow la yaab ma aha kuwa u sahlaya ee ka iibiya koollada ciyaalkaasi oo si aad ah u dhooban agagaarka Ceel-gaab, xil sow kama saarna midka ciyaalka ka iibinaya koollada, sow ma ahan kan sii fidinaya dayacaada iyo cafimaad darrada ciyaalkaasi.

Kuwa caadeystay koollada in ay isticmaaalaan ayaad arkaysaa iney galaan guryaha weydiistaan wax ay cunaan, qaarna ay ku rabsheeyaan Dumarka jidka maraya halka kuwa kalena jidka laga mari la'yahay, waa arrin yaab leh marka aad aragto ilmo aad u yar hadana ku dhex jira falka koollo dhuuqis.

Marka aan isku dayay bal in aan ka wareeysto waxa ku kallifay in ay isticmaalaan koolladaasi ay dhuuqayaan ayaa labo ka mid ah ciyaalkaasi ay I sheegeen in aysan garaneynin wax ay qabtaan, Waxbarasho uma jeedno oo Danyar ayaa nahay marka waa wax annu isku madaddaalino koollada mar haddii aan shaqo heysan.

"Waa caadeysanay maalin walba ayuu iigu daray-ma dayn karno haddii aynu heysan shaqo iyo daryeel toona".

La yaab ayay igu noqotay dhallintaasi sida ay u maahsanaayeen iyo darxumada ka muuqatay iyo kuwa bartamaha jidka iska socda oo qaylinaya, heesaya oo miir la'.

Waalidka ciyaalkaasi halkey ku dambeeyeen sow lama socdaan ciyaalkooda, waa yaab ma lahan qaraabo miyaa iyo Ehel toona, mise waaba sidaasi arrintu oo cidna kama dambayso oo waa Debjir Derbo jiif ah oo bulshada dhib ku haya, yuu xil ka saran yahay Daryeelkooda, dhaqan-celintooda iyo wacyigalinta dhallintaasi.

Ciyaalkani ayaa u sahlan in si kasta loo adeegsado haddi aan si dhaqso ah waxba looga qaban ilayn waxba dhowran mayaan, waxaana la ogaaday dhallintaan oo kale marka meel lagu xareeyo la tarbiyeeyo ay noqonayaan kuwa si kasta dalka u anfaca, dhanka ciidamada qalabka sida iyo ka shaqeynta wax soo-saarka beeraha iyo Warshadaha Dalka.

Hadaba, dowladda iyo hay'adaha qaabilsan daryeelka caruurta iyo Mas'uuliyiinta Gobolka Banaadir waa in ciyaalkaasi fiiro gaar ah loo yeeshaa inta goore goor tahay.

W/D: Osman Dhiblaawe



# DHAQAALAHA & GANACSIGA

## HANTIILOW KIREYSTAHAAGA XAQ DHOWR.



Markaan ka hadleyno Kirada Guryaha Muqdisho maahan wax keligeed saameeya, waana qeybo ka mid ah ayaana loola jeeda, waxaana cirka isku shareeray si naxariis darro ah kirada looga kireysto danyarta iyo shaqaalaha welibana loogu daro caga jugleyn aan waafaqsaneyn nidaamka iyo sharciga wax lagu kireysto, waxaana dhacda had iyo jeer qoys kirada muddada wax yar dhaafto iyadoon ogeysiin la siin looguna daro alaabta in bannaanka loogu soo daadiyo.

Qof muwaadin oo soomaali ah kira badanna oo qaali ah bixinayay muddo badan, taasoo uu xaq u leeyahay muwaadinkaas in la siiyo ogeysiin haddii kale laga dacweeyo saldhigga iyo degmada laakiin aan loo isticmaalin anaa guriga iska leh alaabtiina bannaanka lagu daadiyo, waayo guri kale raadin ayuu u baahan yahay iyo la siiyo waqti, waxaa kaloo jira kireystayaal guriyo ku leh degmooyinka ka fog meelahaas iyaga ah.

Ciidamada qalabka sida, noocyadooda kala duwan waxaa dantooda iyo danta shacabka waxay ku jirtaa inay si isku xirnaan ah ayagoon u kala harin sugaan amniga degmooyinkaas shacabkooduna ay ka dhigtaan saaxiib sabatoo ah shacabka wuxuu doonayaa wax u qabasho, amniga oo la sugo iyo caafimaad.

Goortey doonaan inay ganacsadaan si xor ah, Waddooyinkana u maraan si nabad ah, sidaasna waxaa ku soo noqon lahaa noloshada dadka iyo bilicda magaalada haddaan la ilaalin nolosha bulshada doowladnimo ma jirto nabada nolosha ayey ka horreysaa nabad la'aan caafimaad ma jiro

Nabad la'aan sharafi majirto, nabad la'aan lama cibaadeysan karo, waayo shiikha saq dhexe raba inuu addimo, wuu ka baqaya amniga awadiis, taasina waxaad ku ogaaneysaa adduunka siduu qaali uga yahay talo bixin

Hantiilelyaasha iyo dadka guryaha iska leh ee soomaalida ah, iyagoo ilaah ka cabsanaya ilaalinayana midnimada bulshada iyo isjecelka soomaaliyeed ha dhowreen hana u naxariisteen dadka kireysteyaasha ah haddii lagu dhibaateeyo kirada iyo macaamilka waxaa abuurmaya colaad iyo isnaceyb ha soo dhaweeyeen heykalka dowladnimo magaca iyo sharafka soomaaliyeed.

Haddii saa yeeli waayaan waxaa muuqanaya inaysan qarannimo Soomaalinimo iyo sharaf aysan jirin intaasi waa naga talo.

Waxaa kaloo aan wareysi aan la yeeshay dable maxamed oo deegaankaasi ku nool kana mid ah kireysteyaasha wuxuu ii sheegay degmooyinka amnigooda la sugay inuu ku dhaawacmay saddex jeer ilaaheyna ka badbaadiyay ilaa gobollada shabeellooyinka inuu ku tagay howlgal, sidaa darteed in uu aad uga xun yahay in abaalkiidu noqdo kiro uusan xamili Karin iyo caga jugleyn loogu abaal gudo haddii kirada uu iska bixin waayo alaabta bannaanka loo dhigo wuxuuna yiri waxaan ku fikirayaa haddii aysidaa noqdeen degmooyinka aad dhiigga u shubtay kuwa dambena ee aan ku howlnahay in aan amnigeeda sugno sidaa na yeelimayaan, wuxuu intaas ku daray inay arrintaasi tahay abaal darro iyo garasho xumo dadkiisa ka soo wajahday.

Haddaba si aysan sidaasi u dhicin, mural jab iyo qalbi xumo ka timaada ciidamada iyo shacabka biyiaha ka daba sida oo iyagana ka barbar dagaallama ciidamada, ciidamo aan shacab lahayn ammni ma sugayaan mana dagaallami karaan haddab si loo helo isku tiirsanaan iyo wax wada qabsi nafta iyo maalkaba ay ugu dhaxeeyaan ummadda soomaaliyeed waa in la ilaaliyaa arrin kasta oo keeneysa kala jab weliba loo naxariisto dadka danyarta ah ee soomaaliyeed ha ugu darnaadeen kuwooda difaaca ku howlan had iyo jeerna ka maqan guryahooda.

Waxay Soomaali ku maahmaahdaa adduunyada waa laba boowdo oo midiba maalin qaawan tahay haddaba muwaadin astur cowrada walaalkaa si taada berry loo asturo.

W/Q: Abwaan C/salaam Axmed Gabeyre.

## MALAGA YAABAA IN DIB LOO YAGLEELO ILIHII WAX SOO-SAARKA SOOMAALIYA?

Ilaha wax soo saarku waxay ahaayeen kuwo ay ku tiirsanyihiin dhaqaalaha waddanka, waxaana laga heli jiray waxa ay soo saaraan lacagta adag ee dhaqaalaha dalku uu ku tiirsanyahay marka laga reebo waxa uu dalku qaato ama uu u baahan yahay, waxaana ka shaqeyn jiray shaqaalo aad u badan oo aan tiradooda aan lasoo koobi Karin, waxayna lahaayeen shaqaalahaas farsamo yaqaan sare mid dhexe iyo mid hoose intaba.

Ilaahaas dhaqaale waxaa ku noolaa qoysas Soomaaliyeed oo aad utiro badan kuwaasoo soo saari jiray arday aad u fara badan, hadda waxaa baaba'ay shaqaalihii ka shaqeyn jiray warshadaha kala duwan ee dalka uu lahaa, waxayna kala ahaayeen warshadahaas:-

Warshaddii ugu horreysay ee isnaayb biyaaso ee Sonkorta Jowhar, Warshaddii dharka ee Balcad, Warshaddii hubka yar yar iyo rassaasta, Warshaddii kabka, Warshaddii burka iyo baastada dalka, Warshaddii caanaha, Warshaddii taraqa iyo sigaarka, Warshaddii sifeynta batroolka, Warshaddii hilibka ee Kismaayo,Warshaddii sibirka iyo kuwo kale.

Si kastaba ha noqotee wuxuu lahaa dalka Ilo farabadan oo wax soosaar oo ay kamid ahaayeen Beero aad u farabadan oo ay laheyd Dowladdu oo ay ku kala yiilay Gobollada Shabeellada hoose iyo shabeellada dhexe.

Haddii aan faafaahinno warshadda dharka ee Balcad waxay soo saari jirtay qalab kala duwan oo ay kamid ahaayeen Joodarayaal suuf ah oo laga heli jiray hurdo aad u raaxo badan marka aad kuseexato oo aanan laheyn lafa xanuun ruuxii kuseexadana lamoodi jiray markuu hurdada kasoo kaco ama dareemijiray jirkiisa caafimaad aad fiican iyo nashaad uu kahelay joodarigaas aadka u tayada wanaagsan.

Joodariga warshadda Balcad dadka ku seexdaayi joodari kale kuma doorsan jirin oo meel kale laga keenay, waxay ku tartami jireen dadka kunool gobollada Soomaaliyeed sidii ay u gadan lahaayeen Joodariga lagu sameeyey warshadan.

Waxay kaloo soo saari jirtay Warshadan dharka ay ku labisan jireen Ciidamada noocyadooda kala duwan iyo nooca ay qaataan ardayda Soomaaliyeed min Dugsiyada hoose ilaa heer Jaamacadeed.

Waxaa kaloo kamid ahaa wax yaabaha ay warshaddu soo saari jirtay baatiga noocyadiisa culus oo ah midka labiska ku wanaagsan oo ay aadka u jacelyihiin haweenka Soomaaliyeed.

Waxaa kaloo kamid ahaa daahyada lagu qurxiyo aqallada sidaa Xafiiyada, aroosyada iyo guryaha caadiga ah ee qoosaska Soomaaliyeed intaba.

Warshaddu waxa ay laheyd waaxyo kala duwan sida waaxda gaadiidka, waaxda maamulka iyo maareynta, waaxda wax soo saarka iyo ganacsiga, waaxda shaqada iyo shaqaalaha, kulligooduna waxay lahaayeen agaasimayaal hoos taga maareyaha guud ee warshadda. Waxaana kashaqeynaayey Shaqaalo joogto ah iyo kuwo aan joogto aheyn intaba, kuwaasoo dhammaantood nolol ka heli jiray warshadda.

Inta aan soo sheegnay waxa ay ahaayeen wax yaabo aan haba yaraatee aan dibad aan laga doonin waana ay ku filneyd warshadda waan ay dabooli jirtay baahiyaha looqabay.

Waxaa kaloo ganacsi ahaan loo iib geynjiray dalalka aan deriska nahay sida Itoobiya, Keeniya, Jabuuti iyo Yaman .Arrintaa oo iyaduna ay aheyd mid dhaqaalaha Soomaaliya waxweyn ka tarta oo intii ay baahidii dalka dabooshay haddana dhaqaale kale dibadda kasoo xarey jirtay.

Waxaa kaloo ka mid ahaa warshadihiii ugu horreeyey ee dalka laga hergaliyey ee aadna wax tarka ulahaa warshadda Sonkorta ee Jowhar ee lagu magacaabi jiray xilliggii gumeysiga isnayb biyasa. Waxayna kamid aheyd ilihii wax soosaarka ee uu ka hargeliyey gumeystihii Talyaaniga si uu shaqana usiiyo unasoo jiito dadka Soomaaliyeed uguna helo gacan iyo wada shaqeyn xooggan, wuxuuna tartan kula jiray Dowladda Ingriiska oo heysatay Gobollada waqooyi ee Soomaaliya.

Mashaariicda koonfurta Soomaaliya uu ka hergaliye wuxuu kugu guulaystay dowladda Ingriiska kadib markuu uu siiyey shaqooyin ay ku maareeyaan noloshooda ayuu wuxuu kaga helay xiriir wadashaqeyn oo dhow, waxayna adeegsan jireen Talyaanigu dhaqanka Soomaaliyeed oo ay u dirsan jireen dadka inay soo dumaan oo wadasheynta ay sidaa ku xoogeysato, taasoo ay sababtay inay xitaa qortaan ciidamo iyo horjoogayaal ay u badnaayeen odayaal Soomaaliyeed oo mushaarkoodu meel loo saaray, taasina waxay aheyd shabaq uu ku kalluumeysanayo Gumeystaha Talyaanig.

Muddo ka dib asigoo sii wada abuuristii ilaha wax soosaarka ayaa degmada Afgooye wuxuu ka hergeliyey warshadii E-tob ee maangaha, warshadihii uu sameeyey Gumeystuhu iyo dhulbereedkii xoogga uu ku qabsaday waxaa lagala wareegay sanadkii 1970-kii, waxaana kala wareegay dowladdi kacaanka ee ay hogaaminaayeen golihii sare ee ka koobnaa 25-kii sarkaal ee aan dhiigga ku daadan. Waxayna ahey markii kacaankaasi uu ka dhashay dalku 21/10/1969.

La wareegista hantida Qaranka ee lagala wareegay gumeytihii dalka xoogga ku heystay muddada badan ee aadka u dheer halkeedi ayey kasii socotay wax soosaarka ilaha dhaqaale ee tirada badnaa, waxaana dalku uu gaaray isku filnaansho dhaqaale iyo mid amni, ciidamo lixaad leh inuu muddo yar gudahood ku yeesho.

Si loo gaaro taas oo kale maadaama dalku xor yahay leeyahayna Dowlad madax banaan waa in dib loo yagleelaa ama loo abuuraa udubkuna loo taagaa warshadihii bur buray ee dalka iyadoo aan laga maarmin wax soosaar way haboontahay dib in loo fiiriyo halkii aan shalay maranay wuxuuna dalkeenu maanta leeyahay dhallin yaro wax baratay dibad iyo gudahaba iyo wixii ka nool odayaashii hore ee talo bixiya.

Haddii laysku tiirsado waxaa la qaadi karaa talaabooyin wax ku ool ah, noloshu nabad kama maaranto, nabaddu waa gogol, naftu meel ay ku gama'do ayey dooneysa.

Haddii aan latabcan dalkaaga oo aan wax laga beeran sidee baahi looga baxa oo qaabkee aad dooneysa in baahida iyo baxdid? Haddii aan xoolaha ladhaqan

Sidee baahida looga baxaa?.

Sida hadda noo muuqata waxaa iyagana faraha laga qaadey ee baa ba'aya Xoolihii la dhaqan jiray ee Soomaalidu caanka ku aheyd Ilaha dhaqaale ee waddankuna kow ka ahaa, Beerihii la falan jiray oo isha dhaqaale ee labaad ahaa ee beerashadii laga daayey oo ay dadkii beeraleyda ahaa ee beeraha fashan jiray ay soo dhoobteen kaamanka magaalooyinka waaweyn ee dalka iyagoo isku sheegaya inay yihiin qaxooti, waxna kasugaan Hay'ado shisheeye, qaarna ay cagta saareen waddada ma gafaha iyagoo u bareera khatarta uu leeyahay safarkaa dhib badan iyadoo mar walbo la maqlo meyd wadada yaalo iyo kuwo ma gefaha u xiran iyo kuwo baddu laqdo ama ay soo tuurto, halka kuwana ay dowlado shisheeye ay addoonsadaan oo beeraha ay ku fashaan, Halkaa waxaa kasoo furmay albaabki fakhriga iyo fool xumida.

Waxaan kusoo gabo gabeynayaa maqaalkena talo ah in dib loo nooleeyo Ilihii wax soosaarka Warshadihii iyo Beerihii dalka uu ku tiirsanaa caankuna uu ku ahaa.

Lagdanka Siyaasadeed yuuna idin lug-goyn ee haloo abuuro dhallinta Soomaaliyeed Ilo dhaqaale ee ay ka helaan shaqo ay ku dibiraan noloshooda si ay wadankuna ay wax u taraan xoogna ugu noqdaan.

Waxaa doorasho iyo taageero mudan shaqsigii ka shaqeeya horumarka dalka iyo minimada Ummadda, dantiisa gaarna ka hor mariya midda guud, taana waxaa lagu helayaa sinnaan iyo cadaalad, kalsooni iyo jaceyl loo qaado madaxda waddanka.

Madaxdu hoos ha u eegto baahiyaha dalka ka jira iyo baaba'a ummadda heysata hana loo abuuro dadka Soomaaliyeed oo haddii ay helaan fursad ay ku shaqeystaan aan u baaheyn in siyaasad uun daba cararaane ee karti u leh inay shaqeystaan waddankuna wax muuqda kusoo kordhiyaan.


Sidaa awgeed waxaan ku talinaynaa in boorka laga jafo ilihii dhaqaale ee waddanku lahaa waliba kuwo badanna lagu daro bacdamaa dadkeena intii hore ka badan yahay dhallinta wax baratayna intii hore ay ka badan yihiin.

Inta dooratay inay u shaqeeyaan dowladduna la dhiira geliyo si cadaalad ahna fursadaha shaqo loogugu faa'iideeyo si ay u dareemaan cadaalad iyo kalsooni ay ku qabaan madaxdooda.

W/Q: C/salaan Axmed Gabeere

# MURTI IYO MAAWEELO

**Waxaa diyaariyey Guddoomiyaha Akademiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta Cabdulqaadir Nuur Xuseen (Maax)**



# SOOMAALIYEEY MAXAA NOO HARAY OO AAN ISKU HAYSANAA???!!!.

(Dagaalkasta ujeedadiisu waa in nabad lagu gaaro. Haddii Nabad lagu gaari waayo. Waa in waddo kale looga weecdaa oo wada hadal lagu dayaa.)

Colaad, khilaaf, naceyb, qabyaalad aan dhammaaneyn xal ma soo wadaan. Xikmad ayaa jirta oraneysa "haddii dhibaatada aad suulineyso ay ka dhalanayso, suulinteeda dhibaato ka weyn. Waxay noqoneysaa xaaraan."

Maanta halka xaalkeenu marayo bal eega, Dad ma hayno , midnimo ma hayno, magac iyo haybad ma hayno, Nabad ma hayno. Diin ma hayno. Nolol ma hayno. Keliya Waxaa inoo haray dhulkii oo meelkasta laga hadal hayo. Oo xitaa baddiisii ay maxkamadda hayk dacwadiisa taalo. Dalkeenna soomaaliya dadka Soomaaliyeed oo dhan ayaa wada leh. Laakiin Waxaa ka soocan qofka Waddaniga ah. Qofka waddaniga ah waxa uu ka mid yahay milkiilayaasha dalka. Laakiin waxa uu kaga duwan yahay dhiigiisa ayaa ku tallaalan jaceylka ciidda iyo calanka. Qofka waddani ah waxaa lagu sifeyn karaa astaamahan soo socda:

Qofka Soomaaliya u dhashay ama ku dhashay, Qofka dalka iyo dadka lexjeclo ay ka hayso, Qofka naftiisa iyo xoolihiisa dalka u haya, Qofka carruurtiisa u dhalay inay dalka difaacaan, Qofka dalka wanaaagiisana ku farxa, xumaantiisuna ka naxa, Qofka dalka ay la tahay inuu qofkasta ka xigo, Qofka ku fekera inuu jiilka dambe ugu tago wax ay ku mahadiyaan, Qofka ka qayb qaata hawlaha dalka lagu horumarinayo oo dhan

Haddaba, maanta dadka waddaniyiinta Soomaaliyeed ah werwer iyo walaac badan ayey sida uu xaalku yahay ka qabaan. Iyaga oo talo iyo toosin ay ka tahay ayey halkan ku caddeynayaa dhab ahaan sida xaalka dalkeenna uu yahay. Iyaga oo sawir run ah ka bixinaya. Waxaa kale oo ay halkan ku tilmaamayaan aragti ahaan waxyaabaha la quman iyo kuwa la qalloocan ee u baahan in la toosiyo. Ujeedada ugu badan ee qoraalkan laga leeyahayna waa in xaalku sida uu maanta yahay deg deg wax looga bededelo wadahadal iyo heshiisna dalka lagu soo dabbaalo. Waddanigu wuxuu doonayaa inuu isu soo jiido aragtiyada kala duwan ee ay dadku qabaan. Wuxuu Odorosayaa wanaag. Bal dhuux baaqiisa Nabadeed.

Soomaaliga waddaniga ah waxa uu doonayaa

In Soomaalidu talada dalka ay yeelano

In ciidamada shisheeye ay dalka ka baxaan

In dhaqan xumida lala dagaalamo

n Dadka basaasiinta ah gacan bir ah lagu qabto

In haweenka la asturo oo ay barbaariyaan ubadka

In kheyraadka dalka laga ilaaliyo in la qaato

In kala dambeynta la soo celiyo

In caddaaladda awood lagu fuliyo

In Daroogada iyo Mukhaadaraadka lala dagaalamo

In diin kale aan dalka lagu faafin

In ganacsatada macaash doonka ah ee dadka aan u tureyn la xakameeyo

In dadka qurbojoogta ah meelaha ay taal sirta qaranka iyo xilalka sare aan loo dhiibin

In qabiileysiga iyo qabyaaladda lala dagaalamo

In taranka iyo guurka la badiyo, si tirada dadka Soomaaliyeed loo kordhiyo

In aan qof Soomaali ah sabab la`aan loo dilin

In aan magaalooyinka iyo hantida ummadda la burburin

In aan calanka buluugga ah ee shanta gees leh la beddellin

In maslaxadda iyo wadahadalada sharuud adag aan lagu xirin ama la diidin

In qof Muslim ah oo Soomaali ah aan la gaalaysiin

In Gole culimo iyo gole odayaal khilaafka loola noqdo la sameeyo

In carruurta si siman ay u helaan waxbarasho bilaash ah

In wax kasta xoog iyo xabbad aan lagu xallin

In dalka Soomaaliyeed ay gaar u leeyihiin dadka Soomaaliyeed.

In dalka Soomaaliya uu caddaanka iyo madowba shaqo, ganacsi iyo dalxiisba u imaan karo.

In nidaamka dowladnimada uu jiro

In ilaha Dhaqaalaha la dhiso

In Dalka dib loo dhiso

In sumcadda iyo Siyaasadda Dibadda la hagaajiyo

In bilicda iyo Nadaafadda Magaalooyinka la soo celiyo

In dalka loo dhiso Ciidan Midaysan oo xoog leh

In Mucaawinada dalku ku tiirsan yahay laga baxo

In Nabadgelyada iyo kala dambeynta la soo celiyo

In Midnimada dalka laga shaqeeyo

In adduunyada si dhexdhexaad ah loola macaamilo

In magaca, karaamada iyo sharafta dalka la soo celiyo

In dhallinyarada mashaariic iyo shaqo loo abuuro

Iyo in danta guud laga hormariyo midda gaar ahaaneed

Haddii aad eegto waxa ku qoran Diiwaanka dawladaha dunida lagu tiro koobay ee yaala xafiiska hay`adda qaramada midoobay ee dawladaha heerarkooda kala duwan logu kooxeeyey Soomaalidu waxay markasta ku jirtaa dawladaha takooran ee wax gaar ah lagu asteeyey. Tusaale ahaan:

taxa (liiska) dalalka Musuqmuusuqu la degay Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore.

Dalalka lagu suntay argaxgixisada Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore.

Dalalka ugu amniga xun adduunka soomaaliya waxay kaga jirataa safka hore.

Dalalka ugu burcad badeeda badan adduunka Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore.

Dalalka dawladaha guuldareystay ama fashilmay Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore.

Dalalka ay ka jirto nidaamka dumista dhaw (Fragile) Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore.

Dalalka lagu dilo wareyiyayaasha ugu badan sannadkii Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore.

Dalalka afduubka ugu badan uu ka dhaco Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore.

Dalalka dagaalada soo noqnoqda ay ka jiraan Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore.

Dalalka uu khilaafaadka diinta hareeyey Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore.

Dalalka midabtakoorka ama haybsooca ugu badan ka jiro Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore.

Dalalka ugu saboolsan adduunka Soomaaliya waxay kaga jirtaa Safka hore

Dalalka carruurta la askareeyo Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore

Dalalka haweenka lagu faroxumeeyo (kufsado) Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore.

Dalalka ugu qaxooti badan adduunka Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore.

Dalalka ay shaqo la`aanta dhallinyarada ka jirto Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore.

Dalalka ay siyaasiyiintoodu khilaafaadku ragaadiyey Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore.

Dalalka lacagahoodii intay dhammaadeen, qaatay lacago dalal kale oo ku dhaqma Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore

Waxaa la rumeysan yahay in dalalka adduunka ugu badan ee ay ku nool yihiin dadka barakacayaasha ah inay Soomaaliya safka hore kaga jirto. Waa yaab qof dalkiisa ku nool oo haddana xaqooti ah. Nasiib darro ka weyn ma jirto

Dalalka adduunka ee la biilo ee mucaawinada iyo deeqaha ku nool Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore. Qof la biilana xor maaha XaajI Aadan Afqalooc waa isagii lahaa (Icaanadu xornimaday u tahay eebadii malage, albaabkii gumeystuhu ku xado umamku weeyaane. Wixii uu Ajnebi kuu qabtana Aayotiin ma leh,

Haddii aad maqli jirtay Soomaalidu 100% waa Muslim sunni ah. Intii aan ku jirnay dhibaatada colaadaha Waxaa abuurmay dad badan oo kiristan ah. Haddii ay sidaa ku sii socoto Soomaalidu waxay biiraysaa dalalka loo diiwaan geliyey inay ku nool yihiin dadyow kala diin ah.

Haddii aad maqli jirtay Soomaalidu waa dad isku Af ah. Markii shanta qaaradood la kala aaday Waxaa lagala soo noqon doonaa afaf iyo dhaqano kala duwan. Haddii ay sidaa ku sii socoto waxaad arki doontaa dad Soomaaliyeed oo loo kala afcelinayo.

Sidaad ogtahayba baraha bulshada iyo saxaafada kale waxay beryahan ku soo celceliyaan Kiinya iyo Itoobiya oo doonaya inay Soomaaliya badda la wadaagaan. (madaxda adduunku waxay leeyihiin: suurtogal maaha inay boqol miyan bad la`aan ahaato. 15 milyanna badda afrika ugu dheer ay haystaan. Haddii ay sidaa ku sii socoto waxaad arki doontaa badda Soomaaliya oo dalalka deriska ah loo qaybinayo

Soomaalidii dibedda u dhooftay carruurtii Waxaa ka qaatay Kaniisado iyo Macbadyo. Haddii ay sidaa ku sii socoto, Waxaa soo noqon doona Iyaga oo magacii Soomaalinimada wata oo dhaqan iyo cilmi kale la soo baray. Oday waxa uu ii sheegay qurbaha ku raagay. Soomaalidii dhooftay marka ay dhammaadaan. Waxay dhaleen Soomaali maaha ee haku kadsoomina.

Dadkii dalka yaqaanay, ee dadka yaqaanay, ee dhaqanka yaqaanay, ee diinta yaqaanay, ee xeerarka yaqaanay, ee cadowga yaqaanay, ee colaadda yaqaanay, ee heshiiska yaqaanay way dhinteen ama gaboobeen. Waxaa soo haray jiil 40 jirka ugu ugu weyn yahay oo xaashi cad ah ama cajal faaruq ah oo cidkasta waxay rabto ay ku qorato, waxay rabtana ay ku shubato. Haddii ay sidaa ku sii socoto dadku wuxuu noqon doonaa Robotyo ay dadkii sameystay ku shaqeystaan.

Dalalka adduunka ee Manhaj wareeray ee ay waxbarashadoodu afaf iyo ujeedooyin kala duwan ay ku baxdo, ee ardaydoodana la baro afaf iyo dhaqamo shisheeye Soomaaliya waxay kaga jirtaa safka hore

Dalkasta haybaddiisu waxay ka muuqataa calankiisa, Baasaboorkiisa iyo Safaaradiisa. Safaaradaheena dibedda badankood Waxaa maamula dad aanay la weynayen Soomaalinimada, dhaqanka iyo taariikhda dalkena aan waxba ka aqoon. Haddii ay sidaa ku sii socoto safaaraduhu waxay noqon doonaa guryo ay qabiilooyin iyo dad gaar ah leeyihiin.

Hablaheenii Waxaa guursaday rag shisheeye ah oo madow iyo caddaanba leh. Jeer dhaw haddii ay sidaa ku sii socoto Waxaa dalka ku soo laaban doona aqoonyahano badan oo Abti loo yahay.

Sida muuqata shanta dal ee codka Fiitada ama diidmada qayaxan leh iyo qaramada midoobay waxay ka fekerayaan haddii ay sidan ku sii socoto in dalka Soomaaliya la geliyo Maxmiyad labaad, sidii la yeelay 1950kii. Ka dibna dal na maamulo naloo dhiibo. Talada lala wareego, annaguna aan xoogsato ka noqono.

30 kun oo ciidan Afrikaan ah ayaa waxay dalkeena u joogaan inay na kala celiyaan, oo ay naga shaqeystaan, dhaqamo iyo caadooyin xunna ay nagu tallaalaan. Haddii ay sidan ku sii socoto carruur badan oo aan Soomaali ahayn iyo cuduro aan dhulkan laga aqoon jirin ayaa laga dhaxli doonaa.

Calanka iyo Baasaboorku waxay ka mid yihiin waxyaabaha tilmaamaya qarannimada, jiritaanka iyo haybadda dalka iyo dadka. Waad ogtihiin sida baasaboorkeena loo bahdilay iyo sida muwaadinka wata loo duleysto. Haddii ay sidaa ku sii socoto waxaan dhammaan qaadan doonaa Baasabooro shisheeye

Shaqo la`aanta, sharci la`aanta, welwelka, daryeel la`aanta, daawo la`aanta waxay dadka ku qabsabtay si ay dhibaatooyinkaa silsiladda ah isu ilowsiiyaan inay maandooyiyayaasha ku habsadaan. Sida qaadka, qamriga, xashiishka, taabuuga, iyo sigaarka. Ka dibna waxay ka qaadeen cuduro falkooda la waayey. Haddii ay sidaa ku sii socoto waxa aan noqon doonaa suuqa iyo marinada laga gudbiyo Maandooriyaha dunida.

Dadka Soomaaliyeed waa dad ku nool dal sharci dawladeed aanu ka shaqeynin. Sharci islaamna aanu ku shaqeynin. Xeer dhaqamadeenna aan ku shaqeynin. Waxay u nool yihiin sida xayawaanka. Haddii ay sidaa ku sii socoto Waxaa abuurmi doona dabaqado awood badan iyo kuwo dhaqaale badan oo inta kale addoonsato.

Talada iyo qorshuhu wuxuu ahaa in shanta Soomaaliya la isu keeno. Laakiin hadda Waxaa kala noqday oo kala tegay labadii midowday. Qaybtii koonfureedna Waxaa loo sii kala qaybiyey shan maamul goboleed. Haddii ay sidaa ku sii socotana Waxaa sameymi doonaa imaarado yar yar oo gaashaan buur la ah dawlado shisheeye

Waxaa iska joogto ah diyaarado duqeeya, dalka. Suntan haraaga ah oo lagu shubo badda iyo berriga iyo macdanta iyo khayraadka oo la gurto. Haddii ay sidaa ku sii socoto Waxaa dhulka soo degi doono ciidamo iyo shirkado aan adeegayaal iyo addoomo u noqono.

Caddaalad darradu waxay mareysaa heerkii ugu sareeyey. Guryaha, boosaska iyo dilalka waa dacwooyinka ugu badan ee la isku dulmiyo. Haddii ay sidaa ku sii socoto sharcigu wuxuu noqon doonaa shan cad iyo calaacal.

Dhaqan guur ayaa nagu dhacay haddii la doonayo in ummad la baabi`iyo xagga diinta lagama galo, dhaqaalaha lagama curyaamiyo, dagaalo laguma qabsado keliya dhaqanka ayaa laga beddelaa. Haddii ay sidaa ku sii socoto waxa ay Soomaaliya noqon doontaa meelaha dhaqamada kala duwan ee adduunka lagu soo bandhigo.

Dalalka adduunka marka aad eegto ma jiro dal dhaxalkiisa dabiiciga ah iib ahaan loogu geeyo dalka kale ama waxa uu gaar u leeyahay lagu beero dhulka. Soomaaliya ugaarteedii dabiiciga ahayd Waxaa loo iibgeeyaa dalal kale. Xoolaheedii dhedigna Waxaa loo dhoofiyaa dibedda. Taasina haddii ay si socoto ummaddu waxay noqneysaa dad dhaxal wareegay oo aan lahayn wax gaar ah oo ay ku fannaan.

Cadowgaagu tiro yaraan kaagama adkaado. Dhaqaalo xumo kaagama adkaada. Saanad iyo hub la`aan kaagama adkaado. Taatik iyo xeelad dagaal oo uu ku dheer yahay kaagama adkaado. Waxa uu kaaga adkaadaa marka aad iskhilaaftaan ee kooxo la idiin kala qaybiyo.

Si kastaba ha ahaatee, haddii la doonayo in magaca Soomaaliyeed aan geeska Afrika laga tirtirin. Waa inaan dib u xisaabtanaa. Dagaalku waa inuu dhammaadaa. Naceybku waa inuu dhammaadaa.khilaafku waa inuu dhammaadaa. Qabiilku waa inuu dhammaadaa. Haddii aan dhameyn wayno. Ogaada Soomaali ayaa dhammaan doonta. Ka diba cid kale ayaa reerka u hari doonta.

Haddaba, Alshabaab waxaan leeyahay haddii aad wadahadal furi waydaan, oo aad maalin walba wax qarxisaan. Ama dad dishaan. Oo dadkii Soomaaliyeed ay noqdaan wax dhintay, wax dhaawacmay iyo wax qaxay. Ogaada cadow xoog badan ayaa soo degi doona. Kaas oo muslim iyo gaalaba leh. Inta uu idinka iyo wixii dareen waddiyadeed leh baabi`iyo ayuu dalkana qaadan doonaa.

Dawladda waxaan leeyahay. Dawladnimadu xoog iyo ku tiirsanaan Ajnebi keliya laguma dhiso. Haddii aad debecsanaan muujin waydaan. Ama aad wada hadal, cafis iyo soodumidda dadka idinka ka soo horjeeda aad albaabada u furi waydaan sidaa uun baa midkii yimaadaba uu ugu fariisan doonaa kursi yaal meel holcaysa, oo ay baabuurta gaashaaman ku wareegsan yihiin.hareerahana ay ka qulqulayaan togag dhiig ah.

Baaqa waddaniyiinta waa in qoriga la aamusiiyo. Oo lagu dhaqaaqo Wada hadal iyo heshiis. Waayo Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa "Aan wada hadalno, waa aan heshiino."

**Waxaa Qorey:**

**Cabdulqaadir Nuur Xuseen (Maax)**

# DHAQANKA & SUUGAANTA

W/D: Cabdisalaan Axmed Gabeere.



# KU DHAQANKA MURTIDA IYO MAAH-MAAHOOYINKA

Maah-maahyada Soomaalida ku Maah-maahdo way fara badan yihiin, waxaana laga yaabaa in qaar ka mid ah aan la aqoon macnahooda maadaama uu dadku ku yar yahay akhriska iyo qoraalka,.

Waxaan halkaan ku soo bandhigeynaa macnaha iyo maah-maahdii oo iswata.

Inan iyo Abeesaba Afkooda ayey u dhintaan: waxaa taa looga jeedaa haddey gabdhu edeb leedahay ama tahay mid ku fiican dhaqanka iyo diinta, aadinna meelaha xun-xun way adag tahay sidey dhibaato ugu dhacdo, hadayse ededbarro iyo asraar ku aaddo Suuqyada waxaa soo gaaraya dhibaatooyin fara badan, halkaas ayaana Abeesada loogu magacaabay, waayo abeesadu waa mid aadanaha u geysata dhibaato iyadoo wadata sun Qatar ah, Abeeso waxaa lagu dilaa aragtida.

Rag waxaa ugu daranbaa la yiri, Asraar iyo Abaal ka dhac: waayo qofkasta haddii kibir lagu maago iyo gar darro abaalkiisana loo diido amaba la garan waayo wuxuu yahay aad ayey u dhibaato badan.

Haweenkana waxaa ugu daran baa la yiri, Heblaayooy ama tag ama joog meeshaan waxba kama tihide, waxayna ogaaneysaa inuusan ninkeedu u heynin wax rajo iyo kal gaceyl ah, kumana haboona in haweenku sidaa loogu jawaabo, waayo waa hooyadii guriga waana gacantaadi aad howsha ku aamintay.

Ballan la'aani waa diin la'aan: sababtoo ah qofkii aad ballanta iyo axdiga la gahay ee naftaadii iyo hantidaadi ku aamintay hadduu kaaga baxo waa mid aan diin lahayn.

Wixii araggoodu ku deeqo ayaa uuntoodana ku deeqdaa: waxaana taa looga jeedaa sheyga aad dooneysay ee aad u soo muraadday mar haddaad ka weydo muuqaal iyo aragti soo dhaweyn leh farxad iyo gacmo furan uuntiisana ku deeqi meyso, waxaana halkaa ka soo baxaya dib inaad uga noqoto adigoo daallan oo culeys iyo caga jiid oo la moodo inaad jawaanno cusbo ah tunka ku sidato, sidaas ayey u dhaceysaa taasina.



Saddex lalama Rafiiqo: Ma horreeye, Ma hasaawiye, Ma hanbeeye, waxay taasina u dhaceysaa haddii la maro jid dheer iyo safar qof aan kaa soo leexineyn waddada xun ee aan ku lahayn halkaa soo mar, talo bixin iyo caqli celin ama aan isago maskaxdiisa iyo qalbigiisuba aysan ka soo maaxaneyn curis iyo halabuur u gaar ah isaga uusanna ku lahayn waxaas waxaan kaa leeyahay amaseba waxaa la yiriba, iyo midaan waxba hambeynini haddii loo martiyo reero dan yar oo soomaali ah, saddexdaasi lalama rafiiqo.

Saddex lalama degaa la yiri, Baqeyl damac badan, Fulay daandaansi badan, iyo Doqon fiiro taqaan, waxaa caddeyneysaa taas dhibaatooyinka kaa soo gaaraya haddii aad la Saaxiibto, sababtoo ah doqon fiiro taqaan, adiga unbey ceebahaada ka sheekeysaa ee kama sheekeyso quruxdaada iyo wanaaggaada, mana tixgeliso derisnimada iyo wanaagga, baqeyl damac badan wuxuu kuu diraa guryo iyo buuro dahab ah waxna kama gato mana aha mid quuro lacagaha iyo alaabta lagu kala gadanayo iyo hantida uu kuu diray, halkaasna daal un baa laga dhaxlaa, fulay daandaansi yaqaan, dad ayuu kibir ku soo maagaa, ka bacdina intuu soo cararo ayuu wuxuu yiraahdaa duulaan ayaa nagu soo fool leh oo hebel iyo hebel ayaa nagu soo socda oo duullaan iyo weerar ah, markaad diyaarsato hubkaada ee aad istiraahdo u hiilli Saaxibkaa difaaca wuu kaaga cararaa hadda ogoow awalna isagaa gardarnaa, sidaa darteed saddexdaana lalama dego.

Saddexbaa jirta, Tawin aan baaqan, iyo Tantoomo aan bogsan, iyo Tog biyo xaraar: waxayna ka hadleysaa tawin aan baaqan waa xaqa naaska sida xaqa bini'aadamka oo ah mid aan lagaa cafineyn, mana baaqdo waana tawin aan baaqan, tantoomo aan bogsanna waa da'da, sida aad u taaheyso oo aad u leedahay hebeloow muruq ayaa I go'ay kama bogsaneysid ilaa aad ka dhimato, waayo da'da lagama bogsado, tog biyo xaraar, waa dad badan oo aan talo iyo muwaafaqo midna aan lahayn, waxaana xigmad yaqaanku ku macneeyeen, badda biyaheeda lama cabo, laas yar oo biyo macaanna nafta ayuu wax u taraa, waxaana lagu macneeyaa dad yar oo muwaafaqo leh laaska a yar, madaama uu yahay mid nafta wax u taraya, sababtoo ah baddii ka weyneyd ayaa oon iyo harraad loogu ag dhintay, waxaana halkaa ka garan karnaa dad aan talo ismaqal lahayn waxba isuma tari karaan.

Saddex kale ayaa jirta, waxayna kala yihiin: Dudun Xilo mood, Xabaal Waalid mood, Xiddigo Xoolo mood.

Duddun xilo mood: waa islaan weyn oo reer magaal ah adoo guursaday habeen kasta markaad u timaado nuurka iyo carafta ka soo baxaysa aroos cusub ayaad gashaa, laakiin daal mooyaane dad lagama helo, sidaas ayaa loo yiri duddun xila mood.

W/Q: Gabeyre

# SHEEKADII NABSI HIILIYAY

Islaan laba hablood dhashay ayaa inanteedii weyn necbeyd, tan yarna aad u jeclelyd, wax kasta oo cusub tan yar ayeey siin jirtay.

Guriga waxaa ka shaqeyn jiray inanta weyn, laakiin tan yari waxba ma qaban jirin, aan ka ahayn inay meelahaa ka qeylqeyliso oo ay dadka wareeriso.

Guriga ay islaanta iyo labadeeda hablood galaan waxaa u dhawaa ceel ay dadku biyaha ka soo dhaansadaan, had iyo jeer waxaa biyaha ceelka soo dhaamin jirtay gabadha weyn, laakiin tan yari xitaa dhulka may nadiifin jirin, iska daa biyo ay soo dhaamiso.

Maalin ayey inantii weyneyd biyo u doontay ceelka, waxay sii qaadatay jalxad bir ah oo yar, markii ay ceelka gaadhay ayaa waxay ceelka ugu tagtay islaan weyn oo go'shaal ah huwan oo iyana jalxad bir ah sidatay.

Hooyo adiga ayaa yar ee biyaha hoo ii soo dhaami, ayay islaantii gabadhii ku tiri.

Inantii inta ay islaantii jalxaddii ka qaadday ayay u soo dhaamisay, intii aaney teediiba soo dhaamin.

Markii ay islaantii u soo buuxisay weelkii ayay jalxaddeediina dhaansatay o ay xaggaa iyo gurigoodii u kacday, islaantii aad ayey inantii ugu ducaysay intii aanay tegin.

Islaantii dhashay iyo gabadhii ka yareyd oo kadinka taagan oo iyada hadal haya ayeey u timid inantii weyneyd.

Naa xaggee ku raagtay? Maxaa intaasi oo dhan meesha ka qabaneysay? Miyaad ceelka ku jabtay? Ayeey hooyadeed iyo walaasheed ku yidhaahdeen, inantii ayaa doontay inay jawaab u celiso, ee miyaaneey waxaan………"inantii ayaa damacday inay hadasho laakiin markii ay kalmadihii ugu horreeyay tidhi ayeey aragtay afkeedi oo dhab iyo lacag iyo ubax iyo khudrad iyo dheeman iyo luul ay ka soo dhacayaan.

Islaantii iyo gabadhii kale ee walaasheed ahayd ayaa fajacay, waxay ku noqotay af kala qaad iyo yaab.

Xaggee lagu arkay qof afkiisa waxaan oo kale ay ka soo baxaan ayeey yidhaahdeen.

Islaantii ayaa inantii hoos u wareysatay si ay u ogaato halka ay waxaan oo dhan ka keentay?

Inantii waxba kama ay qarin hooyadeed e waxay u sheegtay halka ay ka keentay arrintan mucjisada ah.

Waxay uga warantay islaantii ay ceelka kula kulantay iyo sidii ay u caawisay iyio in ay islaantu u duceysay.

Islaantii ayaa inanteedi kale u sheegtay in ay iyaduna islaanta soo marto si ay u hesho dahabkan iyo alaabtaan oo kale ee inanteedii kale ay heshay.

In kasta oo inanta yari aaneey raalli ka ahayn, haddana hooyadeed kama diidin arrintii ay ku soo kordhisay.

Sideedaba way ku adkeyd, marka iyada oo caga jiideysa ayeey ceelkii qabatay, waxay sii qaadatay jalxad dhoobo ah, intii aaney waxabadanba sii socon ayeey jalxadkii dhexda kaga sii dhacay oo ay ka jabtay, markaa haddana way soo noqotay oo tu kale ayeey qaadatay.

Markii ay ceelka goor dambe gaadhay ayeey ugu dul-taktay islaantii ay walaasheed sheegeysay oo shalmad huwan.

Intii loo sheegay intii loo sheegay way ka dheereyd islaantu.

Hooyo adiga ayaa yare biyaha ii soo dhaami, ayeey islaantii ku tidhi," orod naga tag taayadiiba uma taag heyno ee".

Hooyo, miyaadan dadka kaa waaweyn ka naxeynin? Ayeey haddana islaantii ku tidhi, ee waa bilaa naxdin, ee hanoo wadin biyahaaga mooyaane" ayeey haddana inantii ku celisay, islaantii inta ay iska gundhisay.

Islaantii waxay la yaabtay huruufka iyo qallooca inantu ilaahay ka keenay waxba yaaneey biyo u dhaamin ee.

Hooyo biyaha ii dhaami aan kuu duceeyee eh, ayeey haddana islaantii tidhi, iyada oo haatan quus taagan.

Ee duco duco ha lahaaninee noo bannee dariiqa, naayaadhaheen, tani ma iyadaana dhashay maxaa nagu soo habaaray!" halkaa ayeey ka sii dharuntay ileyn waa qof qallooc u dhashaye.

Islaantii markii ay biyahii ay cid u dhaamiso wayday ayey iskala noqotay jalxaddeedii ay sidatay oo maran, laakiin iyana habaar ayey kala tiiqtiiqsatay, inantii biyaha inay u dhaamiso u diidday.

Inantii yareyd oo raagtay ayaa goor danbe caga jiid ku tagtay guriga hooyadeed, weli afka ayeey sii buureysay oo waxay ka xumeyd biyahaan loo diray iyo islaantaan baas ee ay la kulantay.

Islaantii oo faraxsan ayaa ka hor timid inanteedii yarayd, oo is tidhi iminka ayaa taana afkeeda ubaxyo iyo dahab ka soo daadan doonaan.

Hooyo dee waad raagtay, alaa malaha maxay islaantii kuu duceysay.

Ee ducadeeda mooyaane……intii ay hadalkii dhameynin ayaa afkeedii waxaa ka soo burqaday abeesooyin iyo masas iyo middiyo usgag ah oo dhan.

Hogayeey, hogayeey oo ba'ayeey…….islaantii ayaa qeylo kaga kacday oo cagaha wax ka dayday.

Inantii ayaa, ayaa qeyladii ka sii dartay, laakiin marka ay sii ooydaba waxaa sii kordha masaska iyo abeesooyinka ka soo daadanaya ilaa iyo keyntii iyo gurigoodii iyo dhulka oo dhami wada abeeso iyo masas noqdeen.

Dadkii oo dhan ayaa dhulkii agteeda ahaa oo idil isaga guuray, markii loo adkeysan waayay masaskii iyo abeesooyinkii iyo usgaggii inanta afkeeda ka soo baxay, xataa ceelkii ayaa laga guuray oo deegaanka ku dhawaa.

Inantii shiikh iyo shariifba waa loo geeyay oo waa loo taag waayay in cudurkaan laga daaweeyo.

Waxaa la doonay islaantii habaarkani uu kaga dhacay, laakiin meel ay jaan iyo cidhib dhigtay waa la garan waayay oo hadha ayaa looga dhacay.

Markii danbe, inantii yareyd iyo masaskii ayaa loo kala tegay, illaa markii dambe iyadiina masaskii afeeda ka soo baxayay qaniineen oo ay sidaa ku dhimatay.

# DHALLINYARADA & CAYAARAHA



## LIVERPOOL OO 4 KULAN OO XOOGGAN KU CIYAARI DOONTA 11 MAALMOOD



Jamaahiirta Liverpool ayay suurogal tahay inay haatanba ku riyoonayaan xilli ciyaareedkani inuu u noqon doono mid qurxoon kaddib qaabka wanaagsan ee ay kooxdoodu muujinayso ilaa haatan.

Reds ayaa figta ugu sarreysa ee miiska kala sarreynta Premier League fadhiya iyagoo siddeed dhibcood dib u eegaya kooxda ugu soo dhaw ee Manchester City kaddib siddeedii kulan ee u horreeyay oo ay guulo 100% ah kusoo raaxaysteen.


Kulanka ugu muhiimsan ee ugu soo horreeya ee ay dagaalka aan waxba la iskula hadhayn gali doonaan ayaa ah midka ay Manchester City Anfield ku qaabilayaan 10-ka bisha dambe balse waxa kasoo horreeya kulamo kale oo xoogan.


Liverpool ayaa kaliya mudo 11 maalmood gudahood ah ciyaaraysa afar kulan oo lagu sifayn karo kuwo sii qaabayn doona ibo furka xilli ciyaareedkooda iyo sida ay u ekaan karaan inta xilli ciyaareedka ka hadhay.

Aan ku bilawnee Reds ayaa Axada kulanka koowaad ee afartaas kulan booqanaysa Man United ciyaarta ugu weyn taariikhda kubadda cagta England iyaga oo raadinaya inay guushoodii labaad mudo sagaal sano ah ku gaadhaan Old Trafford.

Kulanka labaad ayaa ah midka UEFA Champions League, Liverpool ayaa kaddib ciyaarta United ku jihaysan doonta Belgium oo ay Genk kula soo ciyaarayaan kulan CL ah, Guul ay kulankaas soo gaadhaan ayay rajo weyn oo wareega 16-ka ah ku heli doonaan kaddib hal guul iyo hal guuldarro oo ay labada kulan ee hore soo arkeen.

## GARSOORAHA QABANAYA KULANKA MAN UNITED IYO LIVERPOOL OO LA MAGACAABAY





Ole Gunnar Solskjaer ayaa wajihi kara xaalad la mid ah Jose Mourinho ka dib markii garsoore Martin Atkinson loo magacaabay inuu dhexdhexaadiyo kulanka Premier League ee Manchester United iyo Liverpool ee Axada.

Solskjaer ayaa cadaadis weyn ku hoos jira iyadoo United ay badisay kaliya labo kulan oo ka mid ah sideedii kulan ee la ciyaaray horyaalka xilli ciyaareedkan.

Taas bedelkeeda Liverpool waxa ay wada badisay dhamaan sideeda kulan ka hor kulanka ay booqaneyso Old Trafford iyagoo horyaalka ku hogaaminaya sideed dhibcood.

Solskjaer ayaa shaqada tababare ee Manchester United la wareegay markii la ceyriyay tababare Jose Mourinho bishii December ee sannadkii hore.

Kulankii ugu danbeeyay ee tababaraha reer Portugal waxa ay Man United la ciyaartay Liverpool iyadoo uu garsoore ka ahaa Martin Atkinson.

Liverpool ayaa kulankaas 3-1 ku badisay ka dib labo gool uu dhaliyay Xherdan Shaqiri waxayna gabagabo u noqotay waayihii Mourinho ee Manchester United.

Laakiin garsoore Atkinson mar walba war xun uma ahan Man United madaama uu yahay garsooraha qabtay labadii kulan ee badiyeen xilli ciyaareedkan.

## MOHAMED SALAH OO SIYAASADA CAKIRAN EE MASAR IYO QATAR KU SEEGI KARA KOOBKA KOOXAHA ADUUNKA



Kooxda Liverpool iyo jamaahiirteeda ayaa qaba cabsida ah in garabka kooxdooda ee Mohamed Salah uu siyaasada bariga dhexe ee u dhaxaysa dalkiisa Masar iyo Qatar ku seego tartanka Koobka Kooxaha Aduunka.

Tartanka Koobka Kooxaha Aduunka ayaa bisha December ka qabsoomi doona dalka Qatar waxaana xusid mudan in dhawaan dalka Masar ee uu Mohamed u dhashay ay xidhiidhka dublimaasiyadeeda u jareen dhigooda Qatar sanadkii 2017.

Iyadoo ay sidaas tahay dhawaana laga warqabo in inbadan oo kamida siyaasada lagu lifaaqay kubadda cagta ayay Liverpool oo war cad doonaysa arrimo ku saabsan ogolaanshaha Salah ee galista dalkooda waydiisay Qatar.

Sida ay haatan xaqiijinayaan ilo wareedyo kala duwani, Ilo sarre oo la isku halayn karo kana mid ah madaxda Qatar ayaa Reds ku wargeliyay inaysan wax xad gudub ah samayn doonin Salah-na loola dhaqmi doono si lamid ah asxaabtiisa Liverpool.

27 jirkan ree Masar ayaa hore dhawr jeer u booqday dalkaas oo uu ugu tagay saaxiibkiisa hore xulka Masar usoo matalay ee Mohamed Aboutrika oo falanqeeye ka ah kanaalka Sky Sports.

Si kastaba ha ahaatee, Waxa xusid mudan in dhibaatooyin siyaasadeed ay hadheeyeen kubadda cagta haatan waxaana mida ugu dambaysay ee ugu caansani ay tahay Mesut Ozil oo xulka Germany ku qabsaday sawir uu la galay madaxweynaha dalkiisa rasmiga ah ee Turkey-ga Recep Tayyip Erdogan.

## XIDDIG LIVERPOOL AH OO 14 MAALMOOD LAGA GANAAXAY GAROOMADA KA DIB MARKII UU KU MAADSADAY HARRY KANE



Da' yarka kooxda Liverpool Harvey Elliot ayaa garoomada laga ganaaxay muddo 14 maalmood ah ka dib markii lagu helay inuu xadgudbay sharuucda u taala xiriirka kubada cagta Ingariiska isagoo laga duubay muuqaal uu ku maadsanayo Harry Kane.

Muuqaal oo la soo dhigay baraha bulshada bishii July ayaa muujinaya xiddiga khadka dhexe oo ku maadsanaya weeraryahanka Tottenham islamarkaana isticmaalaya tilmaamo loo arkay xadgudub weyn.

Eilliott ayaa ku maadeystay qaabka hadalka ee Harry Kane taasoo meel ka dhac weyn ku ah qof sharafkiisa madaama uusan iska bedeli karin qaabkii uu ku dhashay.

Elliott oo 16 sanno jir ah ayaa si weyn loogu dhaleeceeyay muuqaalka uu duubay, waxaana ay sababtay inuu raaligelin ka bixiyo talaabada uu qaaday.

Xiriirka kubada cagta Ingariiska ayaa soo gabagabeeyay baaritaankooda, waxaana ay ku ganaaxeen xiddigaan inuusan ciyaarin karin kulamada maxalig ah muddo 14 maalmood ah oo ku dhamaaneysa 25ka bisha October.

Elliott ayaa sidoo lagu ganaaxay lacag gaareysa 350 ginni iyo inuu qaato koorso waxbarasho oo ay bixineyso FA-ga.

## MARIO MANDZUKIC OO KAHOR FURITAANKA SUUQA JANUARY USOO WAREEGI KARA MAN UNITED



Kooxda horyaalka Premier League ee Manchester United ayaa lagu soo warramayaa inay xilli ka horreeya furitaanka suuqa kala iibsiga ee qaarada Yurub la wareegi karto weeraryahanka ay ku raad joogto ee Mario Mandzukic.

Weeraryahanka ree Croatia ayaa noqday rabitaanka dookha koowaad ee madaxda United kaddib dhibaatooyinka weerar ee kooxdooda haysta kulamada ay ilaa haatan ka ciyaareen horyaalka.

Tababaraha United ee Ole Gunnar Solskjaer ayaa qirtay inuu raadinayo saxeexa bedelka weeraryahanada Alexis Sanchez iyo Romelu Lukaku oo uu suuqii xagaaga u wada diray Inter Milan badalkooda tooska ahna uusan hore ula soo wareegin.

Si kastaba, Wargeyska Express Sport ayaa shaaca ka qaaday haatan inay Red Devils heshiiska shaqsiga ah la meel dhigeen Mandzukic si ay ugu xaliyaan dhibkooda weerar.

Dhinaca kale Tuttosport oo kasoo baxa Talyaaniga ayaa sheegaya in 33 sano jirkani uu December ee kasoo horreysa bisha suuqu furmayo ee January uu usoo wareegi karo dhinaca Old Trafford.

## Sergio Aguero Oo Shil Gaari Galay Xilli Uu Ku Sii Jeeday Garoonka Tababarka Manchester City



Xiddiga Manchester City Sergio Aguero ayaa shaki gaari oo xun galay ka hor kulanka ay isbuuca soo socda kooxdiisa la ciyaareyso Crystal Palace.

Weeraryahanka reer Argentina oo 31 sanno jir ah ayaa ka badbaaday shilka wax dhaawac ahna ma uusan soo gaaray, laakiin gaarigiisa Range Rover-ka ah ayaa bubruray.


Cagta dhanka gaariga laga kaxeeya ayaa isku wareegatay halka gaariga qeybihiisa kale uu burbur xoogan soo gaaray ka dib markii uu shil galay isagoo ku sii socday garoonka tababarka Manchester City.

Weeraryahanka ayaa ka baaqsaday inuu u ciyaaro xulka Argentina maalmihii u danbeysay waxaana uu baaqi ku sii ahaa Manchester isagoo ka soo kabsanayay dhaawac.

Aguero ayaa tababar ku sameynayay xarunta tababarka Man City ee Etihad Camp labadii isbuuc ee lagu maqnaa kulamada heerka caalami.


Waxaana uu maanta ku sii jeeday xarunta tababarka markii uu shilka dhacay taasoo keentay in gaarigiisa uu burbur xoogan soo gaaro.

# HAY'ADDA CILMI BAARISTA BADAHA SOOMAALIYEED (HCBS)



FanaarkaRaasCaseyr (Guardafui) ookala hagaya Maraakiibtaka/ku socota G.Cadmeed Iyo kuwa ka/kusocda Badweynta Hindiya.





QORE:
CABDIRIXIIN WARSAME DIIRIYE
AG. WAAXDA QAANUUNKA BADDA

# NABAD-GALYADA BADAHA SOOMAALIYEED (SOMALI MARITIME SECURITY).




Dalka Soomaaliya wuxuu ilaah ku manaystey laba badood oo kala ah Badweynta Hindiya iyo Badda Gacanka Cad-meed oo dhererkeedu yahay 3333km, baddaas intaas la eg waxaa ku jira kheyraad iyo istiraatiijiyad meesha ay ku taalo ah oo aan looga maarmeyn dhanka maritaanka aduunka.

Hadaba dalkeenu wuxuu lahaan jirey difaac ciidan badeed oo aad u xoogan kana hortaga wax walba oo keeni kara dhibaato amni oo ka timaadda dhanka badda kana soo gudubta xeebaha, waxaana dhammaan magaalooyinka xeebaha dhaca ku yaaley xarumo howl-gal qorsheysan lehna ciidan iyo cudud ku filan kana hortagi kara wax walba oo soo wajaha lana socon kara dhaqdhaqaaqa xeebaha waxayna la socodsiin jireen xarunta taliska guud ee ciidanka xoogga dalka, taas waxaa cadeyn u ah ciidankeenna badda awoodda uu lahaa guulihii ay ka gaareen dagaalkii 1977 aan la galney dalka Itoobiya iyagoo howl-galo ka fuliyey meelo kabaxsan biyaha Soomaaliya.

Burburkii Dowladdii dhexe kadib waxaa dhacay iney meesha ka baxdo wax walbo oo horey u jirey oo uu ka mid yahay ciidan iyo maamulba, waxaa la waayey cid ka difaacda cadowga baddeena baaxadda weyn, baddeena waxay noqotey meel iska furan oo ay ka dhacaan godob-fallo aad u tira badan aadna u kala khatar badan kadib markii la waayey dhammaan ciidankii heeganka ku ahaa biyaha Soomaaliya ay xaqqa u leedahay oo ah 350NM(648.2) dhumucda Badweynta Hindiya halka Gacanka Cad-meed %50 oo u dhiganta 130km, oo u kala qaybsan awoodda Qaanuuniga ah ee uu siinayo sharciga badaha aduunka ee UNCLOS3 (United Nation Convention on the Law of Sea ) iyo Sharciga Badaha Soomaaliyeed ee Lr.5 26January 1989.

Hadaba waxaa xusid mudan in dambiyada baddeena iyo xeebaha ku teedsan ay ka dhacayeen mudadaas ay aad u soo badanayeen marba marka ka dambeysa soona siyaadayeen falalka baddeena iyo xeebaheeda ka dhacay waxaa ka mid ah;

- Kalluunka Sharci daro looga qaato (Illegal Fishing) oo ay hay'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed u bixisey erey bixin cusub oo ah (Budh-cad Kalluun) ereygaasna wuu dhaqan galay.

Kalluunka sharci daradda looga gurto baddeena waa kan ugu weyn dhibaatooyinka ku dhacay baddeena sababeyna in la xaalufiyo badda oo aan loo turin, waa fal soo socdey tan iyo intii dowladdii dhexe meesha ka baxdey ilaa maanta aan wax xal ah loo helin oo lagaga hortagi karo waana musiibo ku habsatey kheyraadka baddeena oo la jariifayo waliba la dabar- goynayo ukumihiisa la qaadanayo lana burburinayo gunta hoose dhirta ku taal ee uu quuto Kalluunaka.

Sanad kasta dalka Soomaaliya waxaa laga dhacaa $300,000,000 oo ah dhaqaalaha lagu qiyaasey jilaabashada sharci darada ah ee dalalka shisheeye iyo shatiyo been abuur ah oo ay sameysteen shirkado ka kaluumeysta baddeena sida ay sheegtey xarun cilmi-baaris oo laga leeyahay dalka mareekanka oo la yiraahdo (Secure Fishery organization) waxayna warbixin dhameystiran soo saartey sanadkii 2015kii.

Shaxda dalalka shisheeye Kaluumeysiga sharci darada (IUU).

- Wasakheynta Biyaha Baddeena.

Khatarta xaalufka marka laga yimaado khatarta labaad ee baddeena haysata waa wasakheytna biyaha oo ah khatarta ugu weyn una baahan in wax laga qabto dhanka amaankana wax yeelaysa, waxay halis galinaysaa noolaha ku nool badda khatartan oo socotey tan iyo 1991dii lamiana oga inta ay la egtahay balse hay'adda qaramada midoobe ee dhanka deegaanka waxay sheegtey in khatar badan ay jirto dhanka deegaan badeedka Soomaaliya xiligii uu dhacay Sunaamiga 2004tii oo ay soo caariyeen Haamo waaweyn oo aan la aqoon waxa ku jira laguna arkey deegaano xeebeedka qaar ka mid ah, waxaa kaloo la arkey cuduro ay sababeen suntaas oo aan horey loo aqoon iney ka dilaaceen deegaanada qaybtood arintaas oo u baahan baaritaan dheeri ah iyo in la hubiyo Haamaha loona diro khuburo dhanka kiimakada ah, waxaa kaloo jirta wasakheyn ka iman karta dhanka maraakiibta xamuulka shidaalka ee isaga goosha baddeena iyadoo u baahan in lala socdo dhaqdhaqaaqa maraakiibtaas iney ilaaliyaan bad qabka baddeena aysan ku xadgudbin, ciddii ku xad-gudubtana la marsiiyo sharciga wuxuu ka qabo heer caalami iyo heer dalba, waxaa kaloo muhiim ah in laga taxadaro dhibaatada deegaan badeed ay u geysan karaan maraakiibta soo galaysa biyaha dalka ama kusoo xiranaya Dekedaha dalkeena in noqdaan kuwa bad-qaba oo fiyow maryna shuruudaha caalamiga ah ee u degsan sida uu qabo MARPOL PARATOCOL 1978 .

- Khatarta Sedexaad Maraakiibta sheegata ladagaalanka burcad badeedka.

Badda Soomaaliya waxaa jooga tan iyo 2009 markii go'aan laga soo saarey QM oo ahaa la dagaalanka budh-cad badeedka ayaa waxaa yimi dowlado badan oo ilaashanaya maraakiibtooda ganacsi ee marinka u ah biyaha Soomaaliya, waxaa kaloo la sheegay warbixino laga diyaariyey iney maraakiibtaas ku howlan yihiin arimo amni xumo ku ah badda Soomaaliya sida: xaalufin kheyraadka, wasakheyn biyaha iyo deegaanka taasoo khatar ku ah bad qabka baddeena iyo noolaha ku nool warbixintaas waxay ku cadahay (Securing Somali fisheries 2015) lagu soo daabacay.

- Budh-cad badeedka.

Dhibaatooyinka baddeena ka jira ama ka dhacay waxaa ka mid ah budh-cad badeedka taasoo ay sababtey nidaam la'aanta ka dhalatey deegaan xeebeedka Soomaaliya qaarkood, xogaha qaybtood ayaa waxay sheegayaan iney ka dhalatey xaalufinta maraakiibta shisheeye markii ay badatey oo bulshadii xeebaha ay waayeen kalluunkii ama uu yaraadey ama markii ay dhibaateeyeen kalluumeysatada Soomaaliyeed maraakiibta shisheeye oo ay ka dhibaateeyeen agabkoodii jilaabashada waxay sababtey iney is abaabulaan kalluumeysatada ka dibna ay weeraro ka gaystaan iyo qafaalasho badda Soomaaliya iyo meelo ka baxsan taas waxay sababtey in amni xumo ay keento baddeena ayna sabato in la soo dhoobo maraakiib dagaal oo ujeedooyin badan leh balse cuskanaya sharciyad caalami ah ama qaraar QM ay soo saartey una ogolaanaya joogitaankooda, budh-cad badeedka Soomaalida ayaa dhaqdhaqaaqooda aad u xoogana 2008-2013 wixii ka dambeeyey aad ayey u yaraadeen xiligan aan joogno oo ah 2019 waxaa la oron karaa maba dhicin wax fal budh-cad badeednimo ah inkastoo ay leeyihiin hay'adaha QM ee qaabilsan wali baqdin ayaa jirta, waxaa kaloo xusid mudan in raggii budh-cad badeedka ahaa laga shaqaaleeyey maraakiibta jariifka ee kheyraadkeena dhacaysa qaar kalena ay xabsiyada ay ku jiraan oo xukun sugayaal iyo kuwa la xukumey ay isugu jiraan, isku soo duub khatartii budh-cad badeedka waxay sabatey khataro ka waaweyn oo lagu hayo baddeena una baahan darsid iyo xaqiijin laga rabo DFS.

- Hubka sharci darada ah, Dhoofinta dhuxusha iyo Tahriibka.

Dhibaatooyinka ugu waaweyn ee ka dhaca baddeena saameyna ku leh amniga iyo deganaanshaha badda iyo dalka oo idil waa hubka sharci darada ah ee kasoo dagaya xeebaha dalka gacantana u galaya kooxaha nabad diidka ah ee dhibaatada ku ah dalkeena soo kabanaya, hubkan ayaa ah mid soo socdey ka ganacsigiisa ilaa burburkii DS sidaas oo ay tahay dalkeena waxaa saaran cunaqabteen dhanka hubka ah oo ay kusoo rogtey QM kadib markii xasiloonidii ka baxdey meesha waana sida caadada ah in dal kasta oo gala xasilooni daro la galiyo liiska cunaqabateenta balse waxaa jira dowlado dhagaha ka fureystey go'aanka qaramada midoobey iyo ganacsato madax banaanaan taasna waxay sababtey in dhibaatada amni xumo ay sii siyaado balse xiligan aan ku jirno dalka waxaa ka jira kasoo kabasho aafooyinkii hore u dhacay oo ay DFS dadaal dheer ugu jirto in hubka uu gacanteeda soo galo maamulkana uu baaho, dhuxusha ayaa sidoo kale waxay kamid tahay wax yaabaha sida sharci darada ah looga dhoofiyo xeebaha dalka walow ay DFS go'aan adag ka gaartey ay ku mamnuuceyso dhoofinta dhuxusha, waxaa kaloo ayadana ka mid ah wax yaabaha keeni kara amniga inuu xumaado Tahriibka oo lagu safrro xeebaha dalka, dalkeena wuxuu ka mid yahay meelaha dalinta ay ka tahriibto ayagoo u baqoolaya dalalka carabta iyo wadamada kale.

Talo Soo Jeedin:

DFS waxaan u soo jeedin si loo ilaaliyo Qaranimada iyo madax banaanida dalkeena iyo amnigiisa badaha maadaama baddeenu ay dhulka ku sedex jibbaaranto waa in Dowladda Federaalka ah ay dhistaa CIIDANKA BADDA si loo xakameeyo dhammaan nabad gelyo la'aanta Biyaha QARANKA oo looga ilaaliyaa gabood fallada ka dhacayay muddadii 30kii sano ahayd lana unkaa siyaasad dhisid Ciidan Badeed dalkuna wuxuu ku hormari karaa inuu ilaashado kheyraadkiisa Badeed iyo Siyaadadiisa (Sovereignty) Badeed.